FSNAU
Food Security and Nutrition Analysis Unit - Somalia

FEWS NET
FAMINE EARLY WARNING SYSTEMS NETWORK

**SOOMAALIYA: Odoroska Sugnaanta Cuntada and Nafaqada ee ka dib xilliga *Gu* 2013   Bilaha 8aad – 12aad, 2013**


# *Koboca Xaaladeed ka sakow, 870,000 qof ayaa ku sugan xaalad Daran ama Gurmad (Marxaladaha ee Wajiga IPC 3aad iyo 4aad) ee illaa bisha 12aad, 2013*

## Qodobada ugu Muhiimsan

Tirada dadka ku sugan xaalad Daran ama Gurmad (Marxaladaha Wajiga IPC 3aad iyo 4aad) ayaa hadda ah tiradii ugu hooseysay laga soo bilaabo xilligii Macaluusha sanadkii 2011 (Marxaladaha Wajiga IPC 5aad) ee lagaga dhawaaqay qaybo ka tirsan koonfurta Soomaaliya. Arrinta waxa u sabab ah dhawr xilli oo isxiga oo roobab fiican la helay, hoos-u-dhaca qiimaha raashinka, korodhka qiimaha xoolaha, ,korodhka haynta xoolaha qooska iyojoogtaynta gargaarka bani'aadaminimo. Koboca sugnaanta cunnada ka sakow, xaalad nafaqo oo aad u daran ayaa ah mid weli sareysa siiba Koonfurta.

- Qiyaas ahaan tiro dhan 870,000 qof ayaa ku sugnaan doona xaalad Daran ama Gurmad inta u dhexaysa bilaha 8aad – 12aad, 2013 (Marxaladaha Wajiga IPC 3aad iyo 4aad). Tira kale oo lagu qiyaasay 2.3 malyuun, ahna saddex daloolow meel tirada dadka Soomaaliyeed, ayaa lagu sifeeyay inay ku sugan yihiin xaalad walaac leh (Marxaladda Wajiga IPC 2aad), oo ay sugnaantooda cunno tahay mid nugul.
- Heerar Daran ee xaaladda nafaqo oo lagu qeexay (GAM) ayaa ah mid ka sareysa 15 boqolkiiba 18 ka mid ah 42 kooxood ee lagu sameeyay daraasadda kana jirto qaybo badan oo gobolada dhexe iyo Koonfurta Soomaaliya kuna jiraan barakacayaasha. Lixdii caruuraba ee ka hooseeya 5 sano hal ayaa ku sugan xalaad nafaqo dari Ba'an.
- Guud ahaan wax-soo-saarka beeraha ee dhexdhexaadka ah ka sakow, roobabkii Gu'ga (bilaha 3aad – 6aad) ee hore u fayday/qaaday googooskana ahaa ayaa waxay horseedeen inay beero-xoolo dhaqatada Hiiraan helaan wax-soo-saar aad u hooseeya. Qoysaska xoolo-beero dhaqatadu ma haystaan kayd badar, waxana la filayaa inay ku noqdaan ama sugnaadaan xaalada Daran (Marxaladda Wajiga IPC 3aad) inta u dhexaysa bilaha 8aad – 12aad, 2013.
- Joogteynta Mashaaricda bad baadinta noolasha gargaarka bani'aadaminimo oo ay weheliso kaalmo ujeedkiisu yahay in lagu ilaaliyo hab-nololeedyada iyo kobcinta/dhisidda awoodda bulshada ayaa ah qodobo muhiim u ah ka hortaga inay ka sii darto sugnaanta cunnada ee Soomaaliya.


**Jaantuska 1. XaaladdaSugnaanta Cuntada ee bisha 7aad, 2013**




Higasho/Il wareed: *FSNAU, FEWS NET Soomaalyia, iyo la shaqeeyayaashooda.*
Sawiray: *FSNAU*

Khariiradani waxay ka tarjumaysaa liidashada sugnaanta cunnada taas oo loogu talo galay kuwa ey quseyso go'aan-kaqaadasho xaaladaha gurmadka ah. inoomana sheegayso xaalad soo jireen ah xaga sugnaanta cunno. Fadlan guji halkan: [www.fews.net/FoodInsecurity](www.fews.net/FoodInsecurity) si aad u hesho xog dheeraad ah.

## JADAWL XILLIYEEDKA SANNAD CAADI AH




Source: FEWS NET Somalia

FAO  USAID FROM THE AMERICAN PEOPLE
EUROPEAN COMMISSION  UKaid from the Department for International Development  Sida  unicef  UNHCR The UN Refugee Agency  Swiss Agency for Development and Cooperation SDC  Cooperazione Italiana allo Sviluppo Ministero Affari Esteri  CHF SOMALIA

# Guud marka Guud ee Qaranka

*Xaaladda hadda jirta*

*Deegaanada reer miyiga*


Roobabkii wanaagsanaa ama u dhawaa dhexdhexaad ee bilihii 3aad – 5aad 2013 xilliga Gu'ga ee inta badan deegaanada dalka ayaa waxay sababeen in wax-soo-saarka beeraha xilligan Gu'gu yahay mid u dhaw inta dhexdhexaadka ah. Hagaagani waxa uu kordhiyay kaydka badarka ee heer qoys, wax ka taray tayada iyo taranka xoolaha iyo waliba korodhka caanaha xoolaha. Waxaan ku jirin beero-xoolo dhaqatada hab-nololeedka gobolada Waqooyi Galbeed roobabka Gu'ga oo liitay awgood. Natiijo ahaan, wax-soo-saarka galleyda hurdiga ah ee deegaanadani ayaa aad u liidatay, inkastoo wax-soo-saarka beeraha ugu badan la goosto xilliga Karanta,(Bilaha 10aad ila 11aad) halka uu Gu'gu aanu sidaa u sii buurayn.

Korodhka dakhliga iyo fursadaha cunno helidda ee bilahan inta badan deegaanada waxa soo raaca joogteynta ama socoshada gargaarka bani'aadaminimo intii u dhaxeysay bilihii 1aad – 7aad 2013 taas oo wax ka tartay fursadahahelitaanka cunnada.

Waxa jirta kala duwanaan roobabka Gu'ga ee gobolada qaarkood bilihii 3aad – 6aad 2013, wax aka mid ah:

- **Gobolada Waqooyi Galbeed:** Inta badan hab-nololeedyada reer miyiga, waxa jiray roobab fiican/dhexdhexaad ah bilihii 3aad – 5aad, kuwaas oo waxyar ka soo hormaray xilligii caadiga ahaa, laakiin waxay noqdeen roobab daba go'an oo joogsaday badhtamihii bishii 5aad. Hayeeshee, roobab wanaagsan oo aan loo baran ayaa ka da'ay inta badan hab-nololeedka xoolo dhaqatada Guban intii u dhexaysay bilihii 3aad – 7aad, kuwaas oo hagaajiyay daaqii, weelkii biyahana buuxiyay,wanaa jiyay Xoolihiina.
- **Gobolada Waqooyi Bari**: Tayada roobabka ka da'ay deegaanada xoolo dhaqatada waxay ahaayeen qaar dhexdhexaad ah marka loo eego dhibicda iyo baaxadda ay ku da'een; laakiin gobolka Bari iyo hab-nololeedka Deexda ee gobolka Nugaal iyo waqooyiga Mudug waxay heleen roobab aad u liita xilligii Gu'ga. Midda kale, roobabka dhinaca bari ee gobolada Sool iyo Sanaag aad ayay u liiteen baaxad iyo wakhti ahaanba.
- **Gobolada Dhexdhex**: Roobabka ka da'ay inta badan hab-nololeedyada xoolo dhaqatada Hawd iyo Cadduun iyo hab-nololeedka beero-xoolo dhaqatada ee caanka ku ah tacbashada digirta way liiteen xilliga Gu'ga. Hab-nololeedka Deexda waxa helay roobab shuux ah oo googoos ah xilliga Gu'ga oo dhan.
- **Koonfur:** Roobab aad u wanaagsan ama dhexdhexaad ah ayaa ku da'ay inta badan gobolada Koonfurta marka laga reebo hab-nololeedka beero-xoolo dhaqatada gobolada Hiiraan iyo Shabeelaha Hoose, deegaanadaasi oo helay roobab liita oo ay wehelisay mudooyin googoos ah oo roob la'aan ah. Arritani waxay saameyn weyn ku yeelatay hanaqaadka iyo bixitaanka dalagyada.


**Jaantuska 2. Odoroska muuqaalka Sugnaanta Cunnada ee bilaha 8aad – 12aad, 2013**




Higasho/Il wareed: *FSNAU, FEWS NET Soomaalyia, iyo la shaqeeyayaashooda.* Sawiray: *FSNAU*

Khariiradani waxay ka tarjumaysaa liidashada sugnaanta cunnada taas oo loogu talo galay kuwa go'aan-qaadasho ka qaadha xaaladaha gurmadka ah inoomana sheegayso xaalad aad u ba'an ee sugnaanta cunno. Fadlan guji halkan: www.fews.net/FoodInsecurity si aad u hesho xog dheeraad ah.

**Jaantuska 3. Wax-soo-saarka Galleyda iyo Masegada *Gu'ga* ee sanadaha 2008 – 2013 ee koonfurta Soomaaliya (Tan).**




Xigasho/Il: *FSNAU*

Roobabka fiican awgood, wax-soo-saarka badarka (galleyda iyo masegada) iyo dalagyada dakhli ahaan loo tacbado waa dhexdhexaad inta badan Koonfurta. **Isugeynta Wax-soo-saarka guud** waa dhexdhexaad, inkastoo dib u dhac ku yimid xilligii abuuritaanka dalagyada meelaha ay ka dhaceen fataahaadu ee gobolka Shabeelaha Hoose (Jaantuska 3). Caadiyan, Soomaaliya waxay soo saartaa in waxyar ka sareeya rubuc (afar daloolow meel) inta ay u baahan tahay sanadkii. Taariikh-ahaan, wax-soo-saarka Gu'ga waa uu ka sareeyaa wax-soo-saarka Deyrta. Qiyaas ahaan, galleyda soo go'day waxay u dhawdahay sadex daloolow laba wax-soo-saarka badarka (firileyda) xilliga Gu'ga. Galleyda iyo masegada *Gu'ga* 2013 waxa lagu qiyaasay 125,900 tan (T), wax-soo-saarkaas oo u dhaw inta dhexdhexaadka ah, kaas oo ah 95 boqolkiiba celceliska wax-soo-saarka Gu'ga ee 1995 – 2012 iyo 24 boqolkiiba ka sareeyaa celceliska wax-soo-saarka Gu'ga ee shanta sano (2008 – 2012).

Hayeeshee, waxa jirey kala kedisnaan gobolada ah ee dhinaca wax-soo-saarka dalagyada. Inta badan gobolada koonfurta sida Jubada Dhexe, Jubada Hoose, Bakool, Shabeelaha Dhexe iyo Gedo, waxay soo saareen amad ka badan celceliska wax-soo-saarka Gu'ga ee 1995 – 2012. Gobolada kale, wax-soo-saarka badarku waxyar ayuu ka hooseeyay celceliska wax-soo-saarka Gu'ga ee 1995 – 2012, halka uu gobolka Baay ka yahay 97 boqolkiiba iyo gobolka Shabeelaha Hoose oo ah 85 boqolkiiba ee celceliska wax-soo-saarka Gu'ga ee 1995 – 2012. Ka sakow wax-soo-saarka badarka (firileyda), wax-soo-saarka dalagyada dakhli dhalinta loo tacbado waxa lagu qiyaasay 35,150 tan (T), sida sisinta, bariiska, lawska, digirta iyo qaraha/xabxabka. Dalagyada dakhli dhalinta waxa kale ee lagu abuuray/beeray gobolada Shabeelooyinka. Gobolada Hiiraan, Jubooyinka iyo Gedo waxay soo saareen wax-soo-saar wanaagsan ee dalagyada dakhli dhalinta ah.

**Xaaladda daaqu way wanaagsan tahay inta badan hab-nololeedyada xoolo dhaqatada.** Daaqa wanaagsani waxa uu hagaajiyay xaaladda xoolaha. Hayeeshee, roobaabka liita ee deegaanada hab-nololeedyada Sool, Goliska Bari iyo Dooxada Dharoor ee gobolka Bari iyo qaybta bari ee dooxada Nugaal ee gobolka Sool waxay sababeen xaalad daaq oo liidata, calafkii xooluhuna hore u dhammaado iyo biyihiiba.


Awood iibsiga qoysaska hab-nololeedyada xoolo dhaqatada iyo beero-xoolo dhaqatada ayaa kordhay taas oo loo aanaynayo korodhka sare ee qiimaha xoolaha iyo hoos-u-dhaca qiimaha badarka (firileyda). Hayeeshee, awood iibsiga wax-isweydaarsiga hoos ayuu u dhacay Shabeelooyinka maadaama qiimaha galleydu aad kor ugu kacay laga soo bilaabo bishii 1aad, 2013.

Mushaharka tacab goosiga waxa uu door muhiima ku leeyahay dakhliga qoysaska danyarta ah. Tani waxay u sahlaysaa ama fududeynaysaa wax ka soo iibsiga suuqyada. Awoodda wax-isweydaarsiga mushaharka tacab goosiga ee maalintii iyo badarka/firileyda ee reer miyiga iyo magaalooyinka ee inta badan gobolada ayaa waxyar kordhay laga soo bilaabo bishii 2aad, 2013. Waxa xusid mudan in la sheego in awood wax-isweydaarsigu ee mushaharka tacab goosiga ee maalintii iyo badarka/firileyd inuu hoos u dhacay gobolada Awdal, Bari, Baay, Shabeelaha Hoose, Sanaag iyo Togdheer. Bishii 7aad, inta badan wadanka/dalka, awoodda wax-isweydaarsiga mushaharka tacab goosiga ee maalintii iyo badarka/firileyd waxay si wax-ku-ool ah uga sareysaa intii sanadkii hore ama kal hore.

Natiijooyinkii sahanadii la sameeyay bilihii 6aad iyo 7aad 2013 ee xilligii Gu'ga waxay muujinayaa heerar sareysa oo nafaqo dari ba'an ah, oo halbeega heerka nafaqo darida ba'ani ee caalamiga ahi tibaaxayo inay ka sareyso 15 boqolkiiba qaybo badan oo wadanka ah. Tan waxa xaqiijiyay 18 ka mid ah 42 kooxood ee daraasadda lagu sameeyay. Kala duwanaansho xaaladda nafaqada ayaa ka jira gobolada, halkaas oo heerarka nafaqo darida ba'ani (GAM, SAM) ay ka jiraan gobolada koonfurta, dhexe iyo Waqooyi Bari marka la barbardhigo Waqooyi Galbeed.

Natiijooyinka sugnaanta cunnada inta badan deegaanada reer miyiga dalka si wax ku oolimo leh ayay u hagaagtay laga soo bilaabo bishii 12aad, 2012. Arritani waxa loo aanaynayaa wax-soo-saarka beeraha ee dhexdhexaadka u dhaw, fiicnaanta tayada iyo dhalmada xoolaha iyo korodhka tayada iyo qiimaha xoolaha iyo korodhka mushaharka tacab goosiga. Inta badan deegaanada reer miyiga waxay hadda ku sugan yihiin xaalad walaac leh (Marxaladda Wajiga IPC 2) inkastoo qiyaas ahaan 825,000 qof ay wali ku jiraan xaalad ba'an (Marxaladda Wajiga IPC 3) ama xaalad Gurmad (Marxaladda Wajiga IPC 4).

**Jaantuska 4. Awood Isweydaarsiga Mushaharka Tacab Goosiga ee Maalintii iyo Galleyda ee Gobolka Banadir (Muqdisho), 2008 - 2013**




Higasho/Il wareed : *FSNAU*

Inay xaaladdu ka sii darto hab-nololeedka beero-xoolo dhaqatada gobolka Hiiraan ayaa la filanayaa inta u dhexaysa bilaha 8aad – 12aad, 2013. Arrintan oo kale waxa laga filanayaa inay ka dhacdo goobo ka mid ah gobolada Mudug, Galgaduud iyo Shabeelaha Hoose. Halka koboc/hagaag wanaagsan laga soo warbixiyay/sheegay deegaano badan bishii 12aad, 2012, taas oo keentay in dad badani ku sugnaadaan xaalad walaac leh (Marxaladda Wajiga IPC 2) (Jaantuska 1) .

*Deegaanada Magaalooyinka (Reer Magaalka)*

Si la mid ah ka soo raynta ama hagaaga ka muuqday reer miyiga ka sakaw, daraasaddii la sameeyay bishii 7aad 2013 xilligii Gu'ga waxay muujinaysaa hagaag ama ka soo rayn ah sugnaanta cunnada sababta oo ah korodhka awood iibsiga, hoos u dhaca qiimaha maciishada aasaasiga ah iyo adeegaba, tartiib u korodhka dakhliga iyo fursad helidda tacab goosiga intii u dhexaysay bilihii 12aad, 2012 iyo 7aad, 2013.

**Inta badan qoysaska reer magaalka Soomaaliya, cunno quudashada ayaa ah mid aqli gal ah**.

- Caasimadda gobolka Banaadir oo ah meesha sadex daloolow meel dadka reer magaaka ahi ku nool yihiin, in ka badan 75 boqolkiiba dadka ayaa ah kuwo ku nool cunno quudasho aqli gal ah. Inta soo hadhay/hartay 25 boqolkiiba waxay ku sugan yihiin sugnaanta cunno liidata ama qarka saran. Tiradani waxay tibaaxaysaa hoos-u-dhac yar laga soo bilaabo bishii 12aad, 2012. Boqoleydan (75% iyo 25%) waxa lagu saleeyay hal beega cunno quudashada (FCS), oo ah hab lagu qiyaaso kala duwanaanshaha iyo xadiga cunno quudashada.
- Natiijooyinka daraasadeed bishii 7aad ee Muqdisho ayaa sidoo kale tilmaameysaa shan boqolkiiba (5%) aay isticmaaaleen xaalad agadag ee mareynta nolosha si aay u helaan cunto, kuna tiirsan yihiin cunnada ay ka helaan ehelkooda, isirkooda ama bulshadooda ama qof ka tirsan qoyska ay u diraan cid kale si uu ula cunteeyo.

**Guud ahaan, tusaha qiimaha adeegtaha hoos ayuu u dhacay** bilihii 12aad, 2012 – 7aad 2013, marka laga reebo gobolada dhexe oo ah deegaanada qiimayaasha badeecaddu kor u kacday laga soo bilaabo bishii 1aad, 2013. Hayeeshee, xiitaa meelaha tusaha qiimayaasha adeegtuhu kor u kacday, qoysaska danyarta ah waxay ku warbixiyeen inay awoodayaan kharashka maciishadda aasaasiga ah.


- Deegaanada magaalooyinka ee gobolada Waqooyi iyo Koonfur, tusaha qiimayaasha adeegtaha hoos ayuu u dhacay inta u dhexexaysa 3 – 12 boqolkiiba laga soo bilaabo bishii 1aad illaa bishii 6aad, 2013. Hoos-u-dhaca ugu weyn oo 34 boqolkiiba waxa laga soo sheegay Ceel Berde ee gobolka Bakool, Lawyacaddo gobolka Awdal oo ah 25 boqolkiiba iyo Jilib (Jubada Dhexe) oo ah 16 boqolkiiba. Guud ahaan, hoos-u-dhaca tusaha qiimayaasha adeegtaha wuxuu ka tarjumayaa hoos-u-dhaca qiimayaasha ashcaarta/cuntada aasaasiga ah, qiimo yeelashada Shillinka Soomaaliga ah marka lagu bedelanayo doolarka Mareykanga ee Koonfurta Soomaaliya, kaas oo sababay soo dejinta ashcaar jaban oo ka soo degta furdadaha ama marsooyinka dalka.
- Gobolada Dhexe, qiimayaasha adeegtuhu way kordheen nuskii/qaybtii hore sanadkan 2013. Tani waxa loo aynaynayaa liidashada xilligii Gu'ga, noolka badeecadaha oo qaali ahaa bilihii 3aad – 6aad 2013 iyo hoos-u-dhaca badeecaddii ka soo gudbi jirtay dhinaca Xabashida/Itoobiya, wax-soo-saarkooda oo liitay awgeed.

**Inta badan gobolada, awood iibsigu oo lagu qiyaaso isweydaarsiga mushaharka tacab goosiga iyo qiimayaasha badarka (firileyda) waxa weeye mid nagi ama waxyar kordhay** laga soo bilaabo 1aad – 6aad 2013. Tani waxa inta badan u sabab ah hoos-u-dhaca qiimayaasha cunnada aasaasiga ah. Waxa ka reeban ama aan ku jirin magaalada Muqdisho, gobolka Shabeelaha Dhexe iyo Baay, deegaanadaasi colaada ka jirta ayaa saameyn ku yeelatay dhadhaqaaqa ganacsiga keentayna inuu hoos-u-dhaco awood iibsigu (Jaantuska 4). Hayeeshee, awood iibsigu (ToT) wuxuu yahay mid ka sareeya celceliska awood iibsiga shanta sano sababta oo ah korodhka daqliga tacab goosiga iyo hoos-u-dhaca qiimayaasha badarka/firileyda dhawr xilli oo is-dajoog ah.

**Danyarta reer magaalka ahi waxay u hurtaa kharashka ugu badan ku iibsiga cunnada.** Celcelis ahaan, daraasaddii bishii 7aad waxay si joogta ah u muujinaysaa dhammaan deegaanada magaalooyinka in qoysasku dakhlikooda 75 – 86 boqolkiiba ku kharash gareeyaan cuntada. Maadaama ay iibsadaan/gataan inta badan cunnooyinka/raashinka, tani waxay qeexaysaa inay u nugul yihiin qiimayaasha sareeya ee cunada iyo dhibaatooyinka kale ee wax u dhimaya dakhlikooda.

**Heerarka nafaqo darida deegaanada magaalooyinka way ka hooseeyaan ta deegaanada reer miyiga.** Bishii 7aad, 2013, heerarka nafaqo darida caalamiga ah (GAM) wuxuu kor ama sare u dhaafay 15 boqolkiiba ee 3 ka mid ah 13 deegaan magaalo oo kaliyaha.

**Jaantuska 5. Boqolayda Qoysaska Barakacayaasha quutay in ka yar afar nooc-cunno ah 24 saacadood ee u dambeeyay, bishii 7aad, 2013**




Higasho/Il wareed: : *FSNAU*

*Deegaanada/Xeryaha Dadka Barakacayaasha (IDPs)*

Bishii 6aad, 2013, Hay'adda Falaqeynta Sugnaanta Cuntada iyo Nafaqada (FSNAU) iyo la shaqeeyayaasheeda waxay qabteen daraasad ku saabsan xaaladda sugnaanta cunnada iyo nafaqada 11 goobood oo ay degan yihiin Dadka Barakacayaashu. Daraasooyinkan waxa laga qabtay Hargeysa, Berbera iyo Burco ee gobolada Waqooyi Galbeed; Boosaaso, Qardho iyo Garowe ee gobolada Waqooyi Bari; Gaalkacayo iyo Dhuusamareeb ee gobolada Dhexe, iyo Muqadisho, Baydhabo, iyo Dhoobley ee Koonfurta. Hay'adda Qaramada Midoobay u qaabilsan Qaxootiga (UNHCR) ayaa ku qiyaastay 1.1 malyuun qof barakaceen illaa bishii 6aad, 2013. Qiyaas ahaan 625,000 ka mid ah dadka barkacay ayaa ku nool 11 xarumaha magaalooyinka la daraaseeyay. Inta badan barakacayaashan ayaa ku sugan gudaha iyo agagaarka Muqdisho.

**Inta badan qoysaska barakacayaasha ee goobaha/deegaanada daraasadda laga sameeyay ayaa ku kala gedisan noocyada cunnada ay quutaan taas oo ah in ka badan afar nooc cunno 24 saacadoodu ee ugu dambeeyay.** Natiijooyinka daraasadan waxay muujinaysaa hagaaga helidda cunnada taas oo lagu qiyaasay halbeega kala kadisnaanta noocyada cunto ee heer qoys. Inta badan nooca cunno ee la quutaa waxa ka mid ah badarka (firileyda), saliida cuntada/cadday, sonkor, caano iyo marmar hilib ah. Hagaaga kala gedisnaanta cunno cunista ee barakacayaasha waxay la xidhiidhaa ama ku xidhan tahay koboca sugnaanta cuntada ee deegaanada magaaloyinka oo ay ku badan yihiin barakacayaashu.

**Barakacayaashu waxay haystaan hanti kooban ama yar waxayna qabtaan shaqo kasta si ay ugu noolaadaan.** Qiyaas ahaan 40 - 60 boqolkiiba qoysaska ee dhammaan goobaha daraasadda laga sameeyay ayaa xusay in ay dakhliga ugu badan ka helaan tacab goosiga oo ay ku xigto ganacsiga yar yar. Inta badan goobaha, inta u dhaxaysa 50 iyo 75 boqolkiiba barakacayaasha ayaa ku warbixiyay inay dakhliga ka helaan hal meel oo kaliyah ama maba helaan. Barakacayaashu (IDPs) waxay yihiin qaar leh hanti yar ama hanti la'aan ah. Barkacayaashu way iibsadaan cunnada inta badan, laakiin cunno kaalmo ama gargaar ah ayaa u ah meelo ay ka helaan cunno ay quutaan. Dhammaan goobaha, celcelis ahaan, barakacayaasha waxay ku kharash gareeyaan cuntada in ka badan 75 boqolkiiba, oo la mid ah kharashka ay galaan qoysaska kale ee ku sugan magaalooyinka.

**Xaaladda hoyga iyo biyahaba ee deegaanada barakacayaasha way liitaan.** Barakacayaasha ugu badan ayaa wali ku jira hooy ku meel gaadh ah oo ka sameysan walxo ama agab la isku toltolay (tendhooyin). Kuwan ku nool hooy waxyar dhaama kuwa hore, waxay ka sameeyeen jiingado/tarniig ama waxay ku nool yihiin dhismayaasha dawladda ee cidlada ah. Wax u dhexeeyaa ma jiro barakacayaasha muddo yar joogay (in ka yar hal sano) iyo kuwa muddo dheer joogay (in ka badan sanad). Inta badan goobaha barakacayaasha ee gobolada Waqooyiga, qoysasku waxay helaan biyo nadiif ah, marka laga reebo Hargeysa iyo Garoowe magaalooyinkan oo 25 boqolkiiba qoysasku sheegeen inayna helin biyo nadiif ah. Tani waxay la mid tahay macluumaadkii daraasaddii bishii 12aad, 2012. Hayeeshee, xaaladda barakacayaasha way ka duwan tahay magaalooyinka Muqdisho (waxyar ka badan 50 boqolkiiba) iyo Baydhab (ka yar 10 boqolkiiba), oo xaqiijiyay helitaanka biyo nadiif ah.

**Xaaladda sugnaanta cuntada imika/hadda ee deegaanada barakacayaasha way hagaagtay laga soo bilaabo bishii 12aad, 2012.** Baahida loo qabo shaqaale tacabley ah iyo koboca heerarka mushqaayadda tacab goosiga ee magaalooyinka ayaa u horseedday hagaaga awood isweydaarisga tacableyd iyo badarka/firileyda (ToT). barakacayaashu waxay haystaan fursado shaqo, taas u horseeday koboca helitaan cunnada iyo dakhligaba. Barakacayaashu waxa kale oo ay fursad u helaan gargaarada bani'aadamanimo. Arrimahani waxay sababeen sugnaanta cuntada ee deegaanada barakacayaasha inay ka soo hagaagtay xalaad Gurmad (Marxaladda Wajiga IPC 4) una hagaagtay xaalad Ba'an (Marxaladda Wajiga IPC 3). Hayeeshee, deegaanada barakacayaasha Dhuusamareeb iyo Dhoobley waxay wali ku jiraan xaalad Gurmad ah (Marxaladda Wajiga IPC 4). Isla magaaladan Dhuusamreeb, helitaanka adeegyada caafimaad iyo nafaqo way liitaan oo loo aanaynayo ka bixitaanka Hay'adda Dhakhaatiir aan Xuduuda lahayn (MSF) ee bilihii 3aad/4aad taas oo saameyn ku yeelatay sugnaanta cuntada iyo nafaqada. Xaaladda nafaqo ee barakacayaasha Dhoobley waxa lagu qiimeeyay xaalad nafaqo *Aad-u-Daran,* taas oo lagu qeexay inay ka sareyso 20 boqolkiiba GAM. In ka badan 50 boqolkiiba Barakacayaashaas ayaa ah kuwo dhawaan yimid. Barakacayaashan cusub waxa sababay isku dhacyadii/dagaaladii dhawaan ka dhacay qaybo ka mid ah Jubooyinka. Qulqulka barakacayaasha cusub way socdaan kana awood roonaaday waxqabadka hay'adah ka adeega deegaanadaas. Tiro badan ee barakacayaasha cusub waxay xadiday/yareeyey fursadaha la xiiriro hab-nolaleedka barakacayaasha oo aay daalisay nolasha ku dhisan tartanka. Xaaladda nafaqo waxa lagu sheegay inay tahay mid *Aad-u-Daran*.

Xaaladda guud ee sugnaanta cuntada barakacayaasha Soomaaliya hagaagtay ka sakow, Despite moderate improvements in the overall food security status of IDPs in Somalia, wali waxay ku jiraan ama haysata heerar nafaqo dari sareysa oo joogta ah. Heerarka nafaqo darida caalamiga ah (GAM) waxay ka sara martay 15 boqolkiiba 9 ka mid ah 13 deegaan ee barakacayaasha bilihii 6aad iyo 7aad, 2013.


*Xaaladda Nafaqo*

Hay'adda FSNAU iyo la shaqeeyayaasheed waxay sameeyeen 50 nafaqo daraasadood/sahan dalka oo dhan bilihii 6aad iyo 7aad, 2013. Nadiijooyinku waxay tibaaxayaan heerarka nafao darida Ba'ani ay ka jiraan qaybo badan Badhtama iyo Koonfurta Soomaaliya iyo Barakacayaasha, nafaqo daridaas oo ka sareysa 15 boqolkiiba ee heer GAM. Nafaqo daraasadeedyadan la qabtay bilihii 6aad iyo 7aad 2013 waxay muujiyeen in qiyaas ahaan ka badan 206,000 caruurta da'doodu ka yar tahay shan sano ay ku yihiin qaar nafaqo xun. Tani waxay waxyar ka hooseysaa qiyaasta tiradii bishii 12aad, 2012 oo ahayd 215,000. Tiradani waxa ku jira qiyaas 40,950 caruur Soomaaliyeed oo ka yar shan sano oo ku suagn xaalad nafaqo daro aad u ba'an (SAM). Sadex daloolow laba caruurta ku sugan xaaladda nafaqada darani waxay ku nool yihiin Koonfurta Soomaaliya. Natiijooyinka sahamadani waxay muujinayaan inay cuduradu yihiin qodobka ugu weyn ee sababa heerarka nafaqo darida Ba'an ee gobolada Dhexe iyo Koonfurta Soomaaliya iyo wali xeryaha barakacayaasha.

Qaran ahaan, **celceliska heerarka nafaqo darida qaranka (GAM) waa 14.4 boqolkiiba**. Cunug ka mid lixdii cunug ee ka hooseeyay shan sano wuxuu u baahan yahay kaalmo dhinaca nafaqada ah. Heerka dimashada caruurta da'doodu ka hooseyso shan sano maaha mid sidaa u sareysa, inkastoo heerarka nafaqo darida Ba'ani ay aad u sareyso deegaano badan.

Xogta nafaqo darida waxa ka muuqda kala duwanaan gobolada ah. Sareyn heerarka GAM iyo SAM ayaa lagu arkay ama sheegay gobolada Dhexe/Koonfurta Soomaaliya marka la barbar dhigo gobolada Waqooyi Bari ama Waqooyi Galbeed. GAM ugu sareeya (27.4 boqolkiiba) waxa laga diiwaan geliyay hab-nololeedka xoolo-dhaqatada gudaha koonfurreed (Geeleyda) ee gobolka Bakool, halka ka labaad ee ugu sareeya laga soo sheegay hab-nololledka beero-xoolo dhaqatada gobolka Baay (22.6 boqolkiiba) (Jaantuska 6). 68 boqolkiiba dhacdooyinka GAMka iyo 78 boqolkiiba kuwa SAMka waxay ka jiraan Koonfurta Soomaaliya, halka ta guud ee dadweynaha Somaaliyeed muujinayso 56 boqolkiiba oo kaliya. Nafaqo darida Ba'an ee barakacayaasha way ka sareeyaan kuwa bulshad magaaloyinka iyo waliba deegaanada rrer miyiga.

**Jaantuska 6. Dhacdooyinka GAM waxay ka sareysaa 15 boqolkiiba caruurta ka shan sano ee bilihii 6aad iyo 7aad, 2013 tiiyo la adeegsanayo habka SMART**




Xigasho/Ilwareed: *FSNAU*

*Xusid: 42 daraasadood waxay isticmaashay Mideynta Isbedelka/kala guurka iyo Kaalmada/waxtarka (SMART) . Xogta waa la falaqeeyay tiiyoo la adeegsanayo daraasadda/sahanka nafaqo ee Gurmadka (ENA) loona adeegsaday SMART iyo qormada eponifo.*


*Malamaleynta*

Saadaasha Bilaha 8aad illaa 12aad 2013 ayaa ku saleysan malamaleymaha qaranka ee soo socda:

**Cimillada:**

- Deegaannada ey roobabkii Guga ee Bishii 4aad illaa Bishii 6aad ay xumaayeen (Jaantuska 7), ooy ku jiraan Oogada Sool ee gobolka Bari, habnololeedka xoolo-dhaqatada Xeebaha Deexda ee gobollada Bartamaha iyo Waqqoyi-bari, iyo qaybo ka mid ah waqooyiga gobolka Gedo, Bilaha 7aad illaa 9aad Xagaaga ee roob jirin ayay u badan tahay in kheyraadka biyaha dhakhso u dhammaadaan, gaar ahaan maadaama ay baraagaha intooda badan ay buuxsamin xilligii roobabka Guga. Biyaha booyadaha qaaliga ah ayaa laga yaabaa in lagu arko deegaankaas muddada u dhexeysa Bisha 6aad illaa Bisha 9aad ee Xagaaga

**Jaantuska 7. Duwanaasha Qiyaasta Roobka (DQR2) oo milliimitir (mm) ah ee Bilaha 3aad illaa 5aad loo eego celceliska 2001illaa 2012**




Source: U.S. Geological Survey (USGS)/FEWS NET

- Waxaa la filayaa roobab Deyr oo u dhow dhexdhexaad Bilaha 10aad illaa 12aad Soomaaliya oo dhami. Wadarta guud ee roobabka ayaa la filayaa iney noqdaan kuwo caadiga ku dhow ama ka hooseeya, baahsanaantana ku dhow caadiga oo billowda waqtigii caadiga ahaa goor horena dhammaanin. Haddi ay noqoto sida loo badinayo in El Niño-Southern Oscillation- (ENSO-) xaalad deggan, oo ah sida la saadaashay, waxaa jiri doona awood aan badneyn oo cimilo, horseedana in inteeda badani xaaladdu noqoto ku dhowaad dhexdhexaad. Balse, xaaladaha dhexdhexaa ka ah ENSO, qaababka roobka ayaa si degdeg ah isu beddeli kara, ka warheyn dhab ah ayaa lagama maarmaan ah.

- Saadasha roobabka Deyrta ee bilaha 10aad illaa 12aad oo ah mid ku dhow dhexdhexaad ama kuwo caadiga ka hooseeya, waxaa la rajeynayaa helitaanka tigaadda oo kordhabiyo la'aanta iyo masaafada ilaha biyaha oo yaraato dhammaan Soomaaliya laga billaabo bisha 10aad illaa bisha 12aad. Middani waa inay kaashaa taranka xoolaha, maalka laga helaayo iibka xoolaha oo kordhin kara qoyska cuntada ay kasoo iibsanayaan suuqa.

**Beeraha:**

- Bishii 7aad 2013 waxsoosaarka dalagga ee Guga ayaa badi dhexdhexaad ahaa deegaannada badarka soosaara. Qooysaska saboolka ah ayaa loo badinayaa inay heli cunto ay iyagu beerteen illaa bisha 10aad 2013, marka laga reebo dhowrka meelood ee iyagu waxsoosaarkoodu uu aad uga hooseeyey Gu dhexdhexaad ah. Qeybaha uu intooda badan waxsoosaarkoodu ku dhowaa dhexdhexaad, hadda sicirka firida aad ayuu u hooseysaa waxayna u badan tahay in heerarkaa hoose ay sii ahaadaan tan-iyo bisha 10aad 2013.

- Inta u dhexeysa bilaha 10aad iyo 12aad 2013, dalabka shaqo beereedka ee deegaannada beeraha laga beerto ayaa loo badinayaa in koror xilliyeed dhici doono laga billaabo dalabka Xagaaga ee hooseeya gaarina doono heer ku dhow dalab Deyreed caadi ah maadaama la filayo roob Deyreedka 2013/2014 oo ku dhow caadi. Hawlaha dhul diyaarinta ayaa kordhin doonta dalabka shaqada bilaha 9aad/11aad maadaama abuuridda, falidda iyo habuuq goosiga ay sii wadi doonaan baahida loo qabo shaqaale ilaa bisha 12aad.

- Iyadoo la filayo in roobabka ay billowdaan waqtigii caadiga ahaa ee sanada, waxaa la ictiqaaday dhul intii caadiga aheyd ku dhow la beero, iyo bahidii shaqaale oo caadi ah. Beeralleyda deegaannada waxsoosaarka xoogga leh ee firida sida Baay iyo Shabeelaha Hoose ayaa loo badinayaa dhul dheeriya ay ku beeraan dalagga iibka sida sisinta, digirta iyo looska maadaama ay faaido badan leeyihiin. Qaar ka mid ah qooysaska hantiilayaasha iyo kuwa dhexdhexaadka ah ayaa laga yaabaa iney dalagga iibka ku beddelaan firida. Balse, qoysaska saboolka ah ayaa weli abuuri firida, oo ka dhiganaya inteeda badan wax ay cunaan.

**Xoolaha:**

- Iyadoo la filayo roobabka Deyrta 2013/14 oo ku dhow caadi, xaaladda daaqa ayaa xilli ahaan loo badinayaa iney noqdaan caadi, ka dib xoogaagii xumaadey xilligii xagaaga ee bilihii 8aad illaa 9aad, deedna hagaagaan ka dib markii roobabka Deyrta ee bisha 10aad illaa 12aad ay billowdaan

- Inta u dhexeysa bilaha 8aad iyo 10aad 2013 scirka xoolaha, gaar ahaan riyaha, idaha iyo geela ayaa xilliga la kordhi doona ka dib marka xoolaha dhoofka ee Bariga Dhexe ay halka ugu sarreysa gaaraan maadaama xilligii Xajka la gaaray.

- Xaaladda daaqa oo dhexdhexaad ah iyo cudurro xoolaad oo dillaaca oo meesha ka maqan, xoolo marka la eego si wanaagsan u naaxsan ayaa la mala awaaley ugu yaraan illaa bisha 12aad.


- Helitaanka iyo oolista caanaha geela iyo riyaha ayaa loo badinayaa iney caadi sii ahaadaan habnololeedyada xoolo-dhqatada maadaama la filayo dhalmo dhexdhexaad ah oo geela iyo riyaha ah, roobab dhexdhexaad la rajeynayo, helitaanka biyahana iyo xaaladda daaqana isasoo tari.

**Suuqyada iyo Ganacsiga:**

- Sicirka masaggada iyo galleyda dalka ka baxda ayaa loo badinayaa inuu hoos u dhaco ama aanu iska bedbeddelin heerarkan hoose (Jaantuska 8) illaa bisha 10aad uguna wacan tahay hoos u dhac xilliyeedka oo loo badinayo inay raaci doonaan inta badan waxsoosaarka caadiga ah ee bilaha 7aad-8aad ee Guga 2013. Sicirradan ayaa waxey raaci doonaan isbeddel xilliyoodkoodii caadiga ahaa oo in yaroo koror ah inta u dhexeysa bisha 10aad illaa bisha 12aad oo ah xilliga yibil-baroorka dhulka beero qodotada oo dalabku kordho. Sare u kaca sicirka wuxuu fududaan doonaa marka xabuuq cunka dalagga Deyrta ka billaabmo dhammaadka bisha 12aad habnololeedyada diil-webi iyo beer-xoolodhaqatada.

- Hoos u dhaca ama degganaanta sicirka caalamiga ee bariiska, saliidda, sokorta iyo naaftada ee bilaha ka dhiman sanadka 2013 ayay u badan tahay in sicirka waddanka ee alaabtaa inta ka dhiman isla bilahaa 2013. Waxaa u sabab ah waxsoosaarka caalami ee caadiga am ka sarreeya ee dalalka ugu dhoofinta badan, wax yaroo dabac ku sameeyn doona xadidnaanta sahayda caalamka, iyo hakadka galay kobaca dhaqaalaha iyo dalabka caalamka.
- Sicirka bariiska dhoofka ayaa loo badinayaa inuu raaco isbeddel xilliyeedkiisa caadiga ahaa. Waxay u badan tahay in sicirka uu wax yar kordho laga billaabo bisha 7aad illaa bisha 9aad uguna wacan tahay dabeyl Xagaaga oo hakad geliya agabka ay doomaha keenaan dekadaha. Waxaa si aad ah loo filayaa in sicirka bariiska aanu isbeddelin ama wax yar uu hoos u dhaco maadaam uu hoos u dhacay oolistooda suuqa illaa bisha 10aad oo doomaha yaryarka ahi ey billaabi doonaan keenista dalabkuna wax yar uu hoos u dhici doono. Hoos u dhac xilliyeedka inta u dhexeysa bisha 10aad illaa bisha 12aad ayaa kaloo u sabab ahaan doonta arrima caalami ah sida xilliga waxsoosaarka uu ugu sarreeyo qaar ka mid ah qaybiyeyaasha iyo waxsoosaarka oo kordhay dalalka dhoofsha.

**Jaantuska 8. Sicirka masaggeda guduudan ee caadiga ah ee Baydhaba, gobolka Bay, 2008 ilaa 2013, Shilin Soomaali (SOS) kiiladii**




Soosaare: *FSNAU iyo FEWS NET*

- Kasii dhoofinta sokorta, daqiiqda iyo bariiska oo ay ka mid yihiin waxyaalaha uga gudba Soomaaliya dalaka Keenya iyo Itoobiya ayaa loo badinayaa inay hoos u dhacaan hadda illaa bisha 12aad. Illaalada xuduudaha iyo cashuur ka qaadista Keenya iyo Itoobiya ayaa laga yaabaa iney yareeyaan mugga dhoofinta alaabadani. Yaraanshaha dhoofinta ayaa kordhin doonta sahayda cuntada dalka, gaar ahaan gobollada xuduudda ku yaalla.
- Shilinka Soomaaliga (SOS) ayaa loo badinayaa inuu deggenaado heerka sarrifka hadda oo ah in ku dhow SOS 20,000 halkii doolarka Mareykanka ah (USD) ama uu ka sii xoogsado lacagaha qalaad ee muhiimka ah. Waxaa dhaqaajinaya isku deyga Dawladda Federaalka Soomaaliya ay ku xakameyneyso suuqa sarrifka. Bangiga Dhexe ayaa ku iibinaya Shilinka Soomaaliga heer ka sarreeya oo ku dhow SOS 18,000 illaa 20,000 halkii doolar ee Mareykanka ah heerka sarrifka suuqa oo 1 doolarka Mareykanka ay ku beddelayaan in ku dhow SOS 15,000. Illaa hadda, Shilinka Soomaaliga ka xoogeysigiisa doolarka Mareykanka wuu ka gaabiyey in badan xawligii dhakhsaha ahaa kala badhkii kowaad ee sanadkan 2013.

**Kaalmada baniaadminimo:**

- Marka la eego qorshaha mashaaricda kooxda sugnaanta cuntada ee Soomaaliya (FSC) ee dhaqaalahoodiina la hayo una badan tahay in la fuliyo sida ay ku warbixinayaan kuwa la bah-wadaagta ah FSC bilaha 8aad illaa 12aad, kaalmad baiaadminimo waxay taageeri doontaa habnololeedyada, kobcinta helitaanka cuntada, ama siin doonta kaalmo sanadeedka joogtada ah ee hal malyan illaa 1.5 malyan ruux bishi dalka oo idil. Balse, waxtarrada kaalmada baniaadminimo ee deegaanno gaar ah ee dalka ayaan lagu darin falanqeynta mustaqbalka iyo khariideyntooda.

**Colaadda:**

- Nabadgelyo darrida ayaa loo badinayaa iney dacdadeeda sii kororto marka la barbar dhigo belowgii sanadka ee Muqdisho iyo meelaha kale ee dalka. Rabshadaha ku saleysan iska hor imaadyada ayaa ku koobnaan doonaa xoogeeda Muqdisha, gobollada Shabellaha Hoose iyo Dhexe, Baay, Bakool, Gedo, iyo Jubbada Hoose/Dhexe. Colaadda ayaa loo badinayaa in ay sii xayiri doonto fursadda samafalka qasna gelin doonta dhaqdhaqaaqa ganacsiga iyo dadka, kana mid yihiin guurguurka xoolaha iyo shaqo u raadsashada magaalooyinka ee deegaannada ay colaaddu saameysey.


*Sida loo Badinayo Natiijada Sugnaanta Cuntada*

Sida ay ku warbixiyeen Waaxda Falanqeynta Sugnaanta Cuntada iyo Nafaqada (FSNAU) ee Qaramada Midoobey Ururkeeda Cuntad iyo Beeraha (FAO) iyo Shabakadda Ka-digista hore ee Macaluusha (FEWS NET), qiyaastii 870,000 ruux ayaa ku sugnaan doona sugnaan cunto oo Ba'an iyo Gurmad deg-deg ah (IPC Wajiga 3 iyo 4) laga billaabo bisha 8aad illaa bisha 12aad 2013. Sidoo kale, qiyaastii 2.3 malyan oo dad ah ayaa loo badinayaa iney ku sii jiraan Dhibbanaan (IPC Wajiga 2) (Jaantuska 2). Kororkan yare e tirade dadka ku jira xaaladda Ba'naanta iyo Gurmadka deg-degga (IPC Wajiga 3 iyo 4) ee kasoo billowda 825,000 illaa 870,000 waxa inta badan u sabab ah sugnaan la'aanta cunto ee sii xumaaneysa ee habnololeedka Beer-xoolodhaqatada Hiiraan iyo weliba goobo ka mid ah Mudug, Galgaduud, iyo Shabeellaha Hoose.

***Miyiga***

Laga soo billaabo bishii 8aad ilaa bisha 9aad, inta badan dhulka Soomaaliya ayaa ku jiri doona ***xilliga Xagaaga***. In kastoo *Xagaa*gu uu yahay xilli qalalan, cawska qalalan ayaa laga helayaa dhulka daaqsatada. Hase yeeshee, ayadoo la helayo baadka xoolaha ilaa iyo bisha 10aad, biyaha ayaa ku yaraan doona gobollada Waqooyiga, gaar ahaan banka Sool, sidaa awgeed biyaha ayaa si dhaqso ah u yaraan doona xilligan ilaa iyo marka ay roobabka *Jiilaalku* billaabanayaan bisha 10aad.

**Jaantuska 9. Sida loo badinayo in roobabka Deyrta ay noqonayaan bilaha 9aad illaa 12aad oo ah ka sarreya caadi, ku dhow caadi iyo ka hooseeya caadi, Bishii 8aad 2013**




Source: ICPAC

Ayadoo la xiganayo kulankii 35aad **Golaha Odoroska Cimilada ee Geeska Weynaha Africa** oo ay maamusho Xarunta Odoroska iyo Ku-dhaqantka Cimilada (ICPAC) ee Guddiga Urur-dowladeedka Horumarinta (IGAD), saadaashii roobabka *Jiilaal*ka/ Deyrta ee bilaha 10aad ilaa 12aad ee 2013 ayaa muujisay in inta bada dhulka Soomaaliya uu u dhawyahay inuu helo xaddi roobab dhexdhexaad ilaah kuwo ka hooseeya heer dhexdhexaad inta lagu guda jiro xilliga (Jaantuska X). Waxay qiyaaseen suuro-galnimo boqolkiiba 45 in la helo wadar roobab ku dhow heerka dhexdhexaadka iyo suuro-galnimo boqolkiiba 35 wadar roobab ka hooseeya heerka dhexdhexaad. Hase yeeshee, dhul-xeebeedyada Jubbooyinka Hoose iyo Dhexe iyo Shabeellooyinka ayaa la filayaa inay helaan roobab heerarkoodu dhexdhexaad uu yahay iyo kuwo ka sarreeyaba inta lagu jiro xilliga *Jiilaal*ka/ DeyrtaAyadoo lagu salaynayo saamaynta laga yaabo inay yeelato saadaashan, qoysas badan ayaa waxay u dhowaan doonaan inay awoodaan kaabid baahidooda cunno oo ka imanaysa soo-saarkooda dalag oo ku dhowaan doona heerarka dhexdhexaad iyo soo-saarkooda xoolo iyo iibintoodaba. Haddii ay roobabku noqdaan kuwo ka hooseeya heerarka caadiga ah, saamayta ugu ba'an ayaa waxa ay ka jiri doontaa dhulalka koonfuta Soomaaliya ee ku tiirsan roobabka, gaar ahaan dhulka beero-xoolo dhaqatada Hiiraan, Gedo, iyo Shabeellooyinka, kuwaasoo ay hore u saameeyeen xaalado dalag-soo-saar liita xilligii *Guga*. Hab-nololeedyada beero-xoolo dhaqatada Hiiraan iyo Gedo ayaa noqon doona kuwa ugu daran oo ay saamayaan xaalado sugnaan-la'aan cunno maadaama goobahaan ay hore u heleen xilligii *Guga* (bilihii 7aad iyo 8aad) dalag soo-saarkiisu yar oo heerarka caadiga ka hooseeyay.

Intii u dhaxaysay bilihii 8aad iyo 12aad, natiijooyinka sugnaanta cunno ee inta badan dhulka daaqsatada ayaa la filayaa inay ku xasilloonaadaan heer Walaac leh (Wejiga 2aad ee IPC). Hase yeeshee, in kastoo waxoogaa horumar oo sugnaan cunno ah la arka marka loo eego daraasaddii laga sameeyey **hab-nololeedka daaqsatada Guban ee waqooyiga galbeed** bishii 12aad ee 2012, in ku dhow kala bar qoysaska saboolka ayaa lagu leeyahay deyn celceliskeedug gaarayo USD 157, taasoo la mid ah deyntii la soo lagulahaa bishii 12aad ee 2012. Qoysaska qaar ayaa iibinaya xoolohooda dhaqaalka ah si ay cunno u helaan. Si kastaba ha ahaatee, helidda baadka xoolaha ayaa korodhay taasoo ay ugu wacan tahay roobab aan caadi ahayn oo la helay xilligii *Guga* bilihii 4aad/5aad iyo roobabka karanta oo ka da'ay deegaamo aan hore looga heli jirin bilihii 7aad/8aad oo ay wehiliyaan daadad ka soo rogamaday buuraha Golis. Waxa iyana kordhay tirada xoolaha ee iibasami kara oo dhiigoodu wanaagsan yahay. Arrintan baad helidda iyo xoolaha iibsami kara ayaa lagu wadaa inay sii socota ilaa iyo bisha 10aad. Taran aad u sarreeya oo xoolaha ah yaa la filayaa bisha 10aad, taasoo kordhinaysa helida caanaha oo sii horumarin doonta cunno quudashada deegaankaas. Habnololeedka daaqasatada Guban ayaa la filayaa inuu helo roobab xeys ah bisha 1aad, kuwaasoo la failayo inay ku soo aadaan xilli geela uu si aad ah u dhalayo, kaabayana helidda caanaha.

**Habnololeedka Xoolo-dhaqatada Deex-xeebeedka gobollada dhex**e ayaa ah dhul kale oo natiijooyinka sugnaanta cunno ay hore martay marka la bar-bar dhigo sidey ahaayeen xilligii Deyrta 2012da. Hase yeeshee, qoysaska saboolka ee Habnololeedka Xoolo-dhaqatada Deex-xeebeedka ee gobollada dhexe ayaa weli ku sugan xaalal Ba'an (Wejiga 3aad ee IPC) taasoo ay ugu wacan yihiin tiraha xoolaha iibasami kara oo hoos u dhacday ka dib abaarihii 2010 ilaa 2011, gargaarka bani'aadminimo ee gaaraya deegaamada oo xaddidnaa colaado awgood, iyo deynta oo korodhay marka loo eego xilligan xilligiisii kal hore.

Dhanka **Banka Sool ee gobolka Bari,** sugnaanta cunno ayaa la filayaa inay hoos u dhacdo bisha 9aad maadaama uu si aad ah uu hoos ugu dhacay helidda baadka iyo caanaha oo aan gebi ahaanba la helaynin. In kastoo sugnaanta cunno ee meelo ka mid ah dhulka daaqsatada ay sii xumaatay, qiimaha xoolaha oo sii ahaada kuwo wanaagan bilihii agoosto ilaa horraanta bisha 10aad, oo ah xilliga dhoofka xoolaha ee Xajka, iyo qiimaha cunnada daruuriga oo hoos u dhacda ayaa la filayaa inay keenaan inuu horumaro isweydaarsiga firileyda iyo xoolaha, gaar ahaan qiimaha ariga daabaxa oo lagu beddelanayo firileyda kiilo ahaan. Natiijooyinka sugnaanta cunno ee inta badan hab-nololeedyada daaqsatada ayaa la filayaa inay ku xasilloonaadaan heer Walaac (Wejiga labaad ee IPC).

Ayadoo lagu salaynayo qiyaastii dalagga soo go'ay xilligii *Guga* ee bilihii 7aad/8aad ee 2013, qoysaska saboolka ee ku tiirsan beeraha ee gobollada Baay iyo Shabeellooyinka hoose iyo dhexe ayaa la filayaa inay helaan baahidooda firiley ee ay ka quudanayaan soo-saarkooda iyo keydkooda ilaa bisha 12aad. Hase yeeshee, goobaha kale ee xoolo-beero dhaqato iyo webiley ee koonfurta Soomaalia ayaa waxay haysan doonaan kayd firiley ku filan oo keliya laba ilaa afar bilood. Qoysaska ayaa waxay billaabi doonaan inay soo iibasadan cunno bisha 10aad si ay u kaabaan keydkooda. Sidoo kale, keydka cunno ee Hab-nololeedka Beero-xoolodhaqatada Waqooyi-galbeed ayaa ahaan doona mid hooseeya ilaa laga gaaro dallag goosiga firilayda wakhtigeedu dher-yahay ee xilliga Karanta ee bisha 9aad ayadoo ay ugu wacan yihiin soo-saarka dalag oo ka hooseeyey heerka dhexdhexaad. Roobabka Karanta ayaa ilaa iyo bishii 6aad ahaa kuwo ka sarreeya wadarta celcelis. Suuqgeynta firileyda ee dhulka beero-xoolo dhaqatada iyo dhulalka deriskooda ah ayaa u muuqda inuu buuxsami doono bisha 10aad ka dib dallag goosashada Karanta ee heerka dhexdhexaad ku dhow.

Ayadoo lagu salaynayo saadaashii roobabka ku dhow heer caadi ah ee biliha 10aad ilaa 12aad ee *Jiilaal*ta 2013 iyo waxoogaaga horumarka ah ka roobabkii *Guga* ee bilihii 3aad ilaa 6aad 2013, natijooyinka sugnaanta cunno ee waddan ayaa ahaan doona kuwo xasilloon ilaa iyo bisha 12aad ee 2013. Hase yeeshee, sidaa waxa ka duwan goobihii helay roobabka caadiga ka hooseeya ee Hiiraan, waqooyiga Gedo, Daaqsatada Guban, iyo Daaqsatada Deex-xeebeedka gobollada dhexe, iyo Banka Sool ee gobolka Bari. Goobahan ayaa sugnaanohooda cunno la filayaa inay sii xumaadaan gaar ahaan dhulka webiyada iyo beero-xoolo dhaqatada laga billaabo bisha 10aad ilaa bisha 12aad xilliga yabal-boorka. Sugnaanta cunno ee Banka Sool ayaa u muuqta inay xumaan doonto inta u dhaxaysa wakhtigan ilaa bisha 10aad ooyna ugu wacan tahay biyo xumo u keeni doonta qoysaska inay isticmaalaan kharash badan oo dakhligooda ka baxa ayadoo weliba culays uu ka iman doono hayaanka xoolo oo ka yimid Banka Sool ee gobolka Bari xilligii *Guga*.

***Magaalooyinka***

Inta badan dadka reer magaalka ayaa la odorasayaa inay ku sii jiri doonaan xaalad Walaac (Wejiga 2aad ee IPC) bilaha 8aad ilaa 12aad ooyna ugu wacan tahay qiimaha cunnada iyo isweydaarsiga mushahaar hawl-maalmeed iyo firilley oo xasilloonaan doona. Taa waxa sii dheer in fursad u helista shaqo ee kordhay oo ay sababeen fursadaha dhaqaale ee magaalooyinka oo horumaray ay u muuqdaan inay sii horumarin doonaan sugnaanta cunno ee qoysaska ku nool magaalooyinka. Hase yeeshee, xasillooni darrida jirta ayaa sii ahaan doonta sabab xaddidi karaysa helidda cunno ee reer magaalka, gaar ahaan Koonfurta iyo Bartahama. Colaadaha sii socda iyo carqaladeyntooda nolosha magaalooinka ayaa waxay si kordhin doontaa kharashka iyo khataraha la xiriira ganacsiga iyo hawlaha ka soocda suuqyada.

***Deegaamada Barakacayaasha***

Sababo badan ayaa waxay u muuqdaan inay u horseedi doonaan barakacayaasha xasillooni darri dhanka helidda cunnada iyo dakhligaba. Xasillooni darri siyaasadeed, dawladda oo qorshaynaysa inay ka saarto barakacayaasha dhismooyinka dowladeed ee Muqdisho iyo magaalooyin kale oo ku yaalla Koonfurta-Bartamaha, iyo colaado qabiil ayaa waxay u muuqdaan inay sababaan barakac hor leh. Barakacayaasha ayaa mar mar yimaada magaalooyinka sida Dhoobley iyo Muqdisho ayagoo raadinaya taageer bani-aadminimo xilli ay taageero noocaasi ah aan laga heli karin deegaamadii ay hore ugu noolaayeen nabad-gelyo darri awgeed. Barakacayaasha ayaa waxa ay u nugul yihiin dhar arrimood oo soo raaca barakakaca kuwaasoo ay ka mid yihiin faaf cuduro baaha, u nuglaan cuduro ay sabab u yihiin fayadhawr xumo ka jirta deegaamo isku raran ah, nabadgelyo darri toos ah, iyo wajahaad cimilo aad u kulul iyo roobab ay ugu wacan yihiin xaalado guryo xumo. Tirada guud ee barakacayaasha Soomaaliya ayaa haatan bisha 7aad lagu qiyaasaa 1.1 malyuun oo qof, laakiinse tirada barakacayaasha ayaa la saadilanayaa inay waxooga yari kordhi doonto xilliga saadaasha. Barakacayaasha ayaa u muqda inay ku sii jiri doonaan xaalad Ba'an (Wejiga 3aad ee IPC) ama Xaalad Bani'aadminimo (Wejiga 4aad ee IPC) ayadoo horumar xaddidan la filayo inta u dhaxaysa haatan ilaa iyo bisha 12aad.

*Natiijooyinka Nafaqo ee La Filayo*

Saadaasha nafaqada ee bilaha 9aad ilaa 12aad ee 2013 ayaa waxay ku salaysan tahay afar arrimood: 1) taxano xilliyeedka muddada fog, 2) heerka nafaqo darro ee biliha 6aad iyo 7aad, 3) isbeddelada sugnaanta cunno ee goob, iyo 4) xalaadaha caafimaad iyo tasiilaadkoda e goob. Dhanka Waqooyiga-galbeed, xaaladda nafaqo ee hab-nololeedka xoolo-beero dhaqato ee Waqooyi Galbeed ayaa laga yaabaa inay ka sii xumaato xaalad Qaylo-dhaan una gudubto xaalad ba'an taasoo ugu waxan soo-saarkii dalag ee *Guga* bilaha 7aad/8aad oo liitay iyo saamaynta ay ku yeesheen dakhliga ka imanayay iibinta firilayda inu yaraado. Dhanka Wagooyiga-bari, xaaladda nafaqo ayaa la filayaa inay xasilloonaato marka laga reebo hab-nololeedka xoolo dhaqatada Cadduun kuwaasoo filanaya inay xaaladda nafaqo ka xumaato heer Walaac una gudubto heer ba'an, arrintaasoo waafaqsan taxane xilliyeedka loo badan yahay.

**Jaantuska 10. Maseggo ba'daey, Degmada Jalaqsi, Gobolka Hiraan, Bisha 7aad 2013**



Soosaare: *FSNAU*

Koonfurta Soomaaliya, nafaqodarrida dhulka miyiga ee waqooyiga iyo koonfurta Gedo ayaa la filayaa inay ku sugnaato heerka Ba'an ayadoo ay ugu wacan tahay faafka cudurada oo sarreeya, gaarsiinta tallaalka oo hooseysa, iyo dadkoo aan helin biyo iyo fayadhowr ku filan. Dhanka gobollada Jubbbooyinka hoose iyo dhexe, heerka nafaqodarrida ee daaqsatada ayaa sii ahaan doona mid Daran halka beero-xoolo dhaqatada iyo webilayda uu ahaan doono mid Ba'an. Heerka nafaqoddaro ee barakacayaasha Kismaayo iyo Dhoobley iyo kuwa qoysaska ku nool magaalooyinka ayaa la filayaa inuu ka sii xumaado heerka Ba'an ee haatan una gudbo heer aad u Ba'an ayadoo ay ugu wacan yihiiin dillaac cuduro oo laga baqayo sida jadeecada iyo hawlihii caafimaad ee ay joojisay Hay'addii Dhakhaatiirka aan Xudduuda lahayn (MSF). Xaaladaha nafaqo ee beero-xoolodhaqatada iyo daaqsatada gobolka Baay ayaa u muuqda inay sii ahaan doonto mid Aad u Ba'an ooyna ugu wacan yihiin gargaarka bani'aadminimo oo hoos u sii dhacaya, gaar ahaan dhanka caafimaadka iyo nafaqada, iyo faafka cudurrada oo sarreeya. Ka bixidda hay'adda MSF ee Diinsoor ayaa waxay sii xumayn doontaa xaaladaha nafaqo.

**GOOBAHA LAGA WALAACSAN YAHAY**

**Hab-nololeedka Beero-xoolo Dhaqatada Hiiraan**

*Xaaladda Haatan Taagan*

Maadaama Roobabkii Guga 2013 ee da'yay bilihii 3aad ilaa 6aad si liidata u da'een marka loo eego waxkhti ahaan iyo baaxad ahaanba ayna weheliyeen dabaylaha Xagaaga ee engegan ee billowday bishii 7aad, biyaha iyo baadka xoolaha ee hab-nololeedka Hiiraan ayaa si aad ah hoos ugu dhacay bishii 7aad. Waraha iyo biyo-qabatinada dadka ka wada dhexeeya ayaaba hore u sii engegey. Bishii 7aad, xogaha gudaha ka imanaya ayaa muujiyay in biyo iyo baad xumo awgood ay xoolahii deegaankaasi ay u dareereen dhulka Hab-nololeedka Geelleyda ee ku dhaqan isla gudaha gobolka Hiiraan. In kastoo biyo iyo baad helidda ay iska liitadato, haddana soo saarka iyo helidda caanaha lo'da ayaa korodhay tan iyo dhamaadkii xilligii roobabkii Guga ee bishii 5aad, bishii 7aadna qiimaha caanaha lo'da ee Halgan ayaa ahaa kuwo 60 iyo 66 boqolkiiba ka hooseeyey qiimihii bishii 7aad ee 2012 iyo qiimaha celceliska 5-ta sano, siday u kala horreeyaan. Caanahan iska yaal yaalla ayaa la filayaa inay sababeen dhalidda lo'da ee bilihii 6aad/7aad oo heer dhexdhexaad ahayd.

Ayadoo sabab looga dhigayo roobabkii *Guga* ee bilaha 3aad ilaa 6aad oo liitay, koboca dallaga la beeray ee beero-xoolo dhaqatada Hiiraan ayaa si aad ah uga hooseeyay soo-saarka caadiga ah (Jaantuska 10aad). Xaddiga sso-saar ee dalagyada masagada/haruurka iyo gallayda/arabakhida ee Beero-xoolo dhaqatada Hiiraan ayaa gaaraysa oo keliya 38 boqolkiiba ee ee Heerka Celceliska Colaadaha Kadib (PWA) iyo 65 boqolkiiba soo-saarkii sanadda 2012. Taa waxa sii dheer in fursaha shaqo-beereedyada ay joogsadeen horraantii bishii 5aad markii ay roobabku joogsadeen. Soo-saarka aadka u hooseeyey ee bishii 7aad ayaa sababay in qoysaska aysan helin miro ku filan. Suuq wax ka soo iibsiga ayaa waxa sidoo kale hareeyay suuqgeynta miraha oo aad uga liitay heerarka caadiga ah. Soo-saarka firileyda ee dhul-hoosaadka Shabeelle ee ka tirsan deegaanka Qallaafo ee gobolka Shabelle (hore loo oran jiray Godey) kana mid ah Ismaamulka Soomaalida Itoobiya ayaa ka yaraa heerka caadiga ah taasoo lagu sababynayo fatahaado ka yimid Webiga Shabelle, kuwaasoo sababay inay hoos u dhacaan helidda firileyda iyo daabullida firilayda ka timaadda tujaarada xuduudaha isaga tallowda. Intaa waxa sii dheer in mid ka mid ah ilaha dakhli ee Hab-nololeedka Beero-xoolo dhaqatada Hiiraan uu yahay soo-saarka cawska, kaasoo inta ugu badanna lagu iibiyo Beledeweyne ayadoo loo iibsado xaalaha dhoofka ee u sii gudba dekadaha Waqooyiga. Roobabka *Guga* 2013 oo liitay awgood, soo-saarka iyo helitaanka caws ayaa weli ah kuwo liita, saamaynayana jidhka xoolaha iyo caano soo-saarkoodaba.

QImaha xoolaha ayaa ka hooseeya siduu ahaa sanaddii hore taasoo ay ugu wacan tahay **jidhka xoolaha oo sii nugaalday**. Qiimaha ariga daabaxa ee bishii 7aad ayaa lix boqolkiiba ka hooseeya sanaddi hore, balse waxay ay 54 boqolkiiba ka sarreeyaan celceliska shanta-sano. **Qiimaha firilayda dalka laga soo saaro** ayaan la jaan-qaadaynin taxanno xilliyeedka marka qiimaha firilieyda uu hoos u dhaco goosashada xilliga *Guga*, balse, taa cagsigeed, qiimaha ayaa ah kan ugu sarreeya tan iyo qiima dhacii sanaddii 2011 iyo kii bisha 7aad ee 2008. Qiimaha haruurka cad ee Beledweyne bishii 7aad ayaa 19 iyo 36 boqolkiiba ka sarreeyey sanad hore iyo celceliska shanta-sano siday u kala herreeyaan. **Maciishadda dibadda laga soo dejiyo**, gaar ahaan Bariiska, ayaa qiimihiisu korday si aad ah laga soo billaabo bishii 6aad ilaa 7aad ee Beledweyne. Arrintan ayaa waxa loo aanaynayaa kororka sarrifka Shilin Soomaaliga ee Dollarka Maraykanka taasoo ugu wacan suuq-ku-wareegidda lacagaha Soomaaliga ee been-abuurka ah iyo kororka canshuuraha iyo jid-gooyooynika ee gobolka ayna samaynayaan kooxo hubaysan. Qiimaha bariiska ee bisha 7aad ayaa ah mid 11 boqolkiiba ka sarreeya kii bishii 7aad ee 2012, laakiinseweli 21 boqolkiiba ayuu ka yar yahay celceliska shanta-sano. Ka dib markii qiimaha coolaha uu hoos u dhacay kan firilaydana uu kordhay, **isweydaarsiga (ToT)** ariga daabaxa iyo haruurka cad ayaa billaabay inuu si aad ah hoos u dhaco bishii 6aad iyo 7aad. Badeeco isweydaarsida bisha 7aad waxa uu 38 boqolkiiba ka yar yahay kii bishii 7aad ee 2012, balse wuxuu weli 42 boqolkiiba ka sarreeyaa kan celceliska shanta-sano. In kastoo uu jiray hoos u dhac badeeco iswaydaarsiga iyo awoodda wax-iibsi, qiimaha ariga daabaxa ayaa waxa uu weli goynayaa 119 kiilo (kg) oo haruurka cad ah, kaasoo weli u dhigma in ku dhow afar-laab wax ka badan inta rida daabaxa ay goyn jirtay xilligii Macaluusha Koonfurta Sooomaaliya ee 2011dii (Wejiga 5aad ee IPC). **Heerka mushahaar hawl-maalmeed** ayaa hoos uga dhacay 31 boqolkiiba bishii 7aad 2012 iyo bishii 7aad 2013, halka hawl-maalmeedka shaqo ee beerna uu soo saaray in ku filan in lagu iibsado 11 kg oo haruurka cad ah bishii 7aad. Halka uu ka hooseeyo muddooyinkii dhowaa, heerkan mushaar-maalin ayaa waxa uu ahaa mid 22 boqolkiiba ka sarreeya celceliska shanta-sano.

Heerarka **deymaha** ee reeraha saboolka ee haatan taagan ayaa ka korodhay qiyaastii 85 Doollarka Maraykanka ee bishii 12aad ee 2012 ayadoo soo gaadhay 100 Doollarka Maraykanka bishii 6aad ee 2013. Reeraha saboolka ayaa waxay sii wadeen inay deyn ku soo iibsadaan cunnada iyo waxyaabaha kale daruuriga ah ee cunnada aan ahayn inta lagu jiray bilihii 1aad iyo 3aad e Jiilaalka iyo bishii 3aad ilaa 6aad ee xilligi *Guga*. **Lacagaha been-abuurka ee Shilinka Soomaaliga (SOS)** ee lagu daabacay magaalada Cadaado ee gobolka Galgaduud ayaa waxay ku wareegaysay Beledweyne tan iyo bishii 2aad ee 2013. Ayadoo lacagta rasmiga ah ee Shilinka Soomaaliga ama Dollarka Maraykanka (USD), hawlaha ganacsi iyo tujaaro ee goboka Hiiraan ayaa si aad ah loo aafeeyey ilaa iyo bishii 7aad halka ganacisiga gudaha iyo kan u dhexeeya Beledweyne iyo gobollada kalena uu hoos u dhacay. Maamulka gobolka Hiraan ayaa joojiyay in la aqbalo lacagaha been-abuurka ah bishii 7aad. Arrintani ayaa waxay saamaysay awoodda qoysaska saboolka inay suuqyada wax ka iibsadaan ayadoo in badan oo qoysaskaasi ka mid ahna, xilligan, ay iibiyeen muruqooda ioy xoolaba si ay u dhaafsadaan Shilinka Soomaaliga ee been-abuurka ah.

**Nabadgelyo Darri**: Inta badan gobolka Hiiraan oo ay ku jiraan degmooyinka Buuloburte iyo Jalalaqsi ayaa ku sugan gacanta Al Shabaab. Lama soo werin wax shaqaaqooyin ah oo dhex maray Dowladda Soomaaliya (DS) ama ciidamada Hawlgalka Midowga Africa ee Soomaaliya (AMISOM) iyo Al SHabaab saddexdii bilood ee la soo dhaafay. Dilalkii qorsheysnaa ayaa si isu-dhow uga dhacaya gobolka dhexdiisa iyo gobollada deriska ah ee Koonfurta. Jid-gooyooyinka kordhay ee waddooyinka isku xira magaalooyinka waaweyn tan iyo markii Al Shabaab laga saaray magaalada Beledweyne ayaa horseeday inay kordhaan baadka laga qaado alaabada ganacsi. Tani ayaa waxay kentay in uu korodho qiimaha alaabooyinka daruuriga ah oo ay ka mid yihiin bariiska, saliidda cunnada tan iyo billowgii sanadkan.

**Gargaarka Bani-aadminimo**: Hay'adda FAO iyo Hay'adda Cuntada Adduunka (WFP) ayaa waxay ka hirgelinayaaan degmada Beledweyne Lacago Shaqo ku Beddelasho (CFW) iyo Cunno Shaqo ku Beddelasho (FFW), siday isugu xigaan. Qoysaska saboolk ayaana ka faa'iidaya. Hase yeeshee, ugu dhowaan waxa daryeel bani'aadminimo ayaan gaaraynin labada degmo ee kale ee gobolka nabadgelyo darri iyo gargaarka oo aan gaari karin awadood.

Sahamo nafaqo oo laga sameeyey degmada Beledweyne bishii 7aad oona laga sameeyey qaybta waqooyi ee Hab-nololeedka Beero-xoolo dhaqatada Hiiraan ayaa waxa ay heleen Nafaqo Darri Guud gaaraysa 20.2 boqolkiiba (CI 17.3 ilaa 23.5) iyo Nafaqo Darri Ba'an gaaraysa 4.4 boqlkiba (CI 3.1 ilaa 6.1).

Ayadoo ugu wacan dhamaanshaha roobabka *Guga* xilli hore, horraanta bisha 5aad iyo roobabka oo xaddigooda iyo dhul-gaaristooduba liidatay, Hab-nololeedka Beero-xoolo dhaqatada Hiiraan ayaa waxa soo wajahay soo-saarka dalag oo baaqday iyo baad iyo biyo helidda oo ka liita sidii caadiga ahayd. Reeraha saboolka ayaan haysan kayd firiley/cunno, waxayna ku tiirsan yihiin soo suuq ka soo iibsi cunno, inta badanna lagu iibsado deyn. In kastoo ay jirtay waxoogaa koror ah oo quudashada caanaha ah, xaaladda nafaqo ayaa sida muuqata si xumaatay tan iyo sahammadii xilligii *Jiilaal*ta ee 2012, gaar ahaan degmooyinka Buuloburte iyo Jalalaqi halkaasoo haba yaraatee aysan ka jirin adeegyo caafimaad iyo nafaqaba. Bishii 7aad ayaa tirada xoolo ee qoysaska saboolka ay ahaayeen kuwa ka yar tirada lagu helay xog-saleedka ee 1996, balse tirada xoolo ayaa in yar korodhay ka dib dhalmada xoolaha oo ku jirto lo'ada oo heer dhexdheexaad ahayd bilihii 10aad ilaa 12aad ee roobabkii *Jiilaal*ta 2012 iyo bilihii 3aad ilaa 5aad ee roobabka *Guga* ee 2013. Isdhaafsiga xoolaha iyo haruurka cad iyo mushahaar hawl-maalmeedyada ayaa hoos u dhacay, kuwaasoo daciifiyay helidda cunno ee reeraha saboolka. Ayadoo lagu salaynayo sababahan, ayaa sugnaanta cunnada ee reeraha saboolka ah ay sii xumaatay. Hase yeeshee, in ka yar 20 boqolkiiba dadka ku nool halkaasi ayaa loo aaminsan yahay inaysan haysan cunno ku filan ayna hayso nafaqo darri si aan caadi ahay u sarrayso, sidaa awgeed hab-nololeedkan ayaa haatan ku sugan xaalad Walaac (Wejiga 2aad ee IPC) marka laga billaabo bisha 7aad.

***Waxyaabaha la aaminsan yahay***

Ayadoo ay weheliso waxyaabaha la aaminsan yahay ee guud ahaan dalka ee dusha lagu sheegay, arrimahan hoos ku qoran ayaa laga aaminsan yahay Hab-nololeedka Beero-xoolo dhaqatada Hiiraan:

- Nabadgelyo darrida ayaa u muuqata inay sii kordhi doonto marka la bar bar dhigo dhamaadkii sanaddii hore iyo horraantii sanadkan, ka dib dhaarintii Dowladda Federaalka Ku-meelgaarka ee cusub. Xasillooni darrida ayaa la filayaa inay kordhiso tirada jidgooyooyinka ka jira gobolka.
- Qiimaha quutul daruuriga ayaan u muuqan kuwo waafaqsan taxane-xilliyeedyaa ayagoo si aad ahina u kordhi doonta ilaa iyo bisha 12aad taasoona ugu wacan yaraanshiyo la filayo inuu yaraado keydka cunnada ee suuqyada ee ka imanaya soo-saarka dalag ee gudaha iyo kuwa isaga goosha soohdimahaba iyo weliba kororka lacagaha baadka ee jid-gooyooyinka, kuwaasoo kordhinaya kharashka ku baxa gaadiidka, kaasoo qiimaha ku kordhinaya iibsadayaasha.
- Xoolo badan ayaa la saadaalinayaa in la xaraasho si loogu iibsado cunto, agabka muhiimka ah ee loo baahanyahay iyo in deynta dib loo bixiyo, gaar ahaan laga bilaabo bisha 10 aad illaa 12aad. Tani waxaa loo badinayaa iney si xawli ah u sii yareysa haynata xoola, gaar ahaan qoysaska dan yarta ah.

- Helitaanka xoogsiga beeraha ayaa loo badinayaa inuu la kordho xilliga inta u dhaxeysa bisha 9 aad illaa 12aad sababtuna aay tahay roobabka xilliga Deyrta oo la saadaaliyey iney noqondoonaan kuwo dhex dhexaad ah ama ka hooseeya dhexdhexaadka iyo iyadoo la rajeynayo in la helo heyb xoogsi dhex dhexaad ah ee abuurid iyo falid, inta badan aagga wbiga ee deriska la ah

***Sida loo Badinayo inay Sugnaanta Cuntadu Noqoto***

Natiijada sugnaanta cuntatada ee qoysaska saboolka ayaa aad loogu badinayaa iney waxyeeleyso Goosashada miraha beeraha ee xiliga Guga 2013 ee bilaha 8/9 aad oo si weyn ugua hooseysey heerka dhex dhexaadka ah, sababayna kedka haruurka ee qoysaska iyo suuqa oo xaddidan. Ka sokow helitaanka caanaha Lo'da inta u dhaxeysa bilahaa 8aad iyo horaanta 9aad, daqliga laga helayo iibka caana ayaa la saadaalinayaa inuu hoos u dhaco laga billaabo bartamaha bisha 8 aad illaa 12 aad iyadoo qeyb lo'da ka mid ah guri doonto iyo wax soo saarka caanaha oo hoos u dhaca. Tani waxaay aad u sii yareyneysaa daqliga qoysaska saboolka ah. Waxaa intaa wehliya, sabab la xiriirta wax soo saarkooda beeraha oo ba'ay kaasoo aay cuni lahaayeen illaa bisha 12 aad, qoysaska danyarta. waxaay ku sugnaan doonaan waqti dheeri ah barooro yibir laga billaabo bisha 8 aad illaa 12 aad. Qoysaska saboolka ah waxey inta badan ku tiirsanaan doonaan cunto ammaah ah laga billaabo hadda illaa bisha 12 aad.

Siinta caanaha iyo Sakada wax soo saarka beeraha ee saboolka ayaa loo badinayaa iney si weyn uga hooseyn doonto heerka dhexdhexaadka ah sababo la xiriira saameynta aay ku yeeshay xilliga ba'ay qoysaka ladan. Si kastaba ha ahaatee, inta lagu guda jiro bilahaa 11/12 aad qeyb ka mid ah qoysaska saboolka ah ayaa heli kara Ari'saka ah, laakin kalmada noocan ah ee ilaha cunto waxaa loo badinayaa iney ku koobnaan doonto qoysas tir yar oo gaar ah. Deeqda cuntada ee gobolka Hiraan ayaa iyana ku koobnaan doonta degmada Belet-weyn oo kaliya, sidaa darted waxii ka baxsan degmadaa wax macna ah ma sameyn doonto sababo la xiriira nabad gelya darrada waawged ayaa koobaya helitaanka kaalmada bani'aaddannimo meelaha aay maamulaa Al-shabaab. Sababo la xiriira baahsanaanta da'mada rooka Guga ee bilaha 3-5 aad oo liidatey iyo dabeysha xilliga xaaga qallalan, helitaanka miro duurka ayaa la odorosayaa inuu hooseeyo, iyo sidoo kale isagoo aan u taagnaan Karin il cunto oo muhiim uh ah qoysaska danyarta ah.

Si uu uga jawaabo hoos u dhaca maxsuulka sugnaan la'aanta cuntada, qoysaska saboolka ah waxey raadsan doonaan lacag iyo cunto ammaah ah, taasoo sii kordhin doonta culeyska qaanta lagu leeyahay. Waxey sidoo kale yareyn doonaan cunnooyinka aay jeceyihiin sida massagada cad iyo bariiska waxayna maciinsan doonaan moordiga. Si kastaba ha ahaatee, laga billaabo bisha 10 aa-illaa 12 aad oo la odorosay in roobka xilliga Deyrta uu ahaan doono dhex dhexaad ama ka hooseyn doono dhex dhexaadka, daqliga shaqada beeraha ayey u badan tahay inuu ka caawiyo qeyb ka mid ah qoysaska saboolka ah helitaanka cuntada, laakin waxaan suurto gal noqon doonin in daqligaa uu ku filaado si uu u baabi'yo cunto yarowga jira.

Laga billaabo bisha 8aad illaa 12 aad, sababo la xiriira heerka deynta oo korodhay, daqliga laga helo iibka xoolaha oo yaraaday, iyo xoolaha u iibsami kari oo wiiqmay in badan oo qoysaska saboolka ah, helitaanka amaahda oo yaraadey, habka isu kalmeyntiibulshada oo gabaabsi noqotey,max suulka sugnaanta cuntada ee qoysaska saboolka ah ayey u badan tahay inuu sii xumaado. In badan oo qoysaska danyarta ayaa loo badinayaa iney galaan heerka sugnaan laáanta cuntada ee ***Dhibbanaashaha*** (IPC wejiga 3) inta u dhaxeysa bilaha 8aad- 12aad, kuna waari doonaan inta laga gaarayo bilowga goosashada beeraha ee Deyrta bilowga bisha 1aad 2014.

**Hab nololeedka xoolo dhaqatada Oogada sare sool ee Gobollada Bari iyo Sanaag**

*Xaaladda Hadda Jirta*

Sababo la xiriira wadarta roobabkii Guga 2013 ee ka daáy Oogada sare sool ee gobolka Bari, bilihii 3aad illaa 6 aad oo ka hooseeyey heerka dhex dhexaadka iyo roobabkii ku dhawaa dhex dhexaadka ee ka da'ay Oogada sare sool ee gobollada Sool iyo Saanaag, tiro baaxad leh oo xoolo ah ayaa ka soo guuray gobolka bari una guuray gobollada Sool iyo Sanaag ayaa saaray culeys dheeri ah saarey kheyraadka dhulka ee meelayowgaas. Hadda, Tigaad dhex dhexaad ah ayaa weli laga heli karaa Oogada sare Sool ee gobollada Sool iyo Sanaag, laakin elitaanka biyaha ayaa liita/hooseeya ( Jaantuuska 11), kaasoo sababaya biyo dhaan qarashkoodu sarreeyo iyo qiimaha biyaha oo kordhay xilligii Xagaaga. Qiimaha biyaha oo gaaraya illaa 100,000 kun Somali Shiling fustadii (200 litir) ayaa horey loo soo tabiyey. Haynta xoolaha ee qoysaska saboolka ah ayaa ku dhaw xogtii salka aheyd ee la qaadey sand 2012 taasoo aheyd qiyaas ku dhaw 50 -70 Ari ah iyo iyadoo heerka haynta tirad xooluhu aay si aan xawli aheyn u kor dheysay labadii xilli oo lasoo dhaafay.

Sababo la xiriira dhaqnaanta xoolaha oo dhex dhexaad ah, qiimaha xoolaha ayaa kordhay bishii 4aa 2013. Bisha 7aad, qiimaha ariga dabaaxa ah ayaa ayaa ku dhawaa 60 Dollar, qaab koror laga ogaadey meelo badan oo dalka, marka laga reebo gobollada jubada dhex iyo jubada hoose halkaaso qiimaha xooluh aay weli ka sarreeyaan marka loo eego sanadkii tagey laakiin aay ka hooseeyan marka loo eego inta hartay waddanka. Qiimayaashaan sare waxay raaceen qaab la mid ah kororkii sanadkii hore sabatoo ah rabitaanka xoolaha dhoofka ah oo sarreysay. Qiimaha badeecadaha dibadda laga keeno ayaa inta badan daganaa bilowgii sanadka 2013 iyo iyagoo inta badan ka hooseeyey meel ahaan shan meelood dhammaam badeecadaha, aayna ka mid yihiin sonkorta, bariiska iyo

saliidda cuntada. Tani waxaay sida badan ka timid qiimaha caalamka oo dhacay, sababtoo ah waxa soo saarka dalalka dibadda wax u iibgeeya oo xooganaa laga soo bilaabo sanadkii 2012. Hoos u dhaca qiimaha quudka daruuriga ah iyo kororka qiimaha xoolaha ayaa sababay kororka xoolo ku iibsashada firileyda. Rida dabaaxa ah ee bishii 7 aad lagu iibinanyey 60 Doollar ayaa lagu heli karayey 50 kiilo oo sonkor ah taasoo qiimaheedu ahaa mid ku dhaw 33 Doollar, 50 kiilo oo bariis ah oo qiimahoodu ku dhawaa 30 Doollar iyo caag saddex litir qaad ah oo saliidda cuntada ah oo qiimahiisu ku dhawaa 5 Doollar.

**Jaantuska 11. Haro bulshadeed ingagan, Degmada Iskushuban, Gobolka Bari, Bishii 7aad 2013**



Soo saare: *FSNAU*

Qiimaha caanaha ayaa kordhay bishii 7 aad Oogada sare Sool sabatoo ah helitaankooda oo yaraaday laga soo billaabo bishii 6 aad 2013 iyo iyagoo ka sarreeyey boqoliiba laba iyo toban sanadkii tagay, iyadoo la isticmaalayo celceliska qiimaha suuqyada la tilmaansado ee Iskushuban gobolka bari, Cerogaabo gobolka Sanaag, iyo Laas-caanood gobolka Sool. Sababo la xiriira wadarta da' amadii roobka ee xilligii Deyrta 2012/13 oo ku dhaweyd dhex dhexaad Oogada sare Sool ee gobolka bari, xoolo ka yimid gobollada Sool iyo Sanaag ayaa u guuray gobolka bari laga billaabo bishii 5 aad illaa 6 aad 2013 iyadoo weli uu jiray daaq ka haray kii baxay xilligii Deyrta gobolka bari. Dhalidda Geela iyo riyaha ayaa lasoo sheegay, taasoo keentay in helitaan caanuhu ahaayeen heer ku dhaw dhex dhexaad gobollada Sool iyo Sanaag, Si kastab ha ahaatee, helitaanka caanaha ayaa ka hooseeeyey heerka dhexdhexaadka gobolka bari, sababtoo ah xoolihii oo ka guuray xilliga guga. Welina aan ku soo noqon gobolka bari.

**Kaalmada bani aaddanimo** ayaa ah mid kooban dagaanada xoolo dhaqatada ee Oogada sare Sool. Sida laga xigtey kooxda sugnaanta cuntada, 14,000 oo qoysaka saboolka ah ee gobolka bari ayaa la siiyey kaalmo bishii 7aad, halka gobollada Sool iyo Sanaag la caawiyey 16,000 iyo 6,000 kiiba.

**Colaadda sokeeye ayaa si ballaran hoos uga dhacday Oogada Sool** laga soo billaabo roobabkii Deyrtii ugu dambeeyey ee bishii 12 aad. Qaabka Hayaanka xoolah oo sida badan aay sababyeen dagaalladu waqtiyadii hore ayaandhicin labadii xilli ee ugu dambeysay. Roobabkii Bilihii 10-12aad Deyrta iyo 3-6 aad ee guga xoolahu waxaay u daaq tageen sidhib la'aan ah meelaha la daaqo xilli roobaadka kana baxsan goobahaas, iyo qaabka hayaanka xoolah oo aay taban taabeen qabaa' ilka kala gedisan, una ogolaanayey qeybaha qabaa' ilka kale dhul leh daaq iyo biyo kasoo ku saleysnaa wax is dhaafsi. Hase yeeshee, xiisadda siyaasdee ee u dhaxeysa maamullada Somaliland iyo Punt land ee gobollad Sool iyo Sanaag ayaa xannibay ganacsiga, gaar ahaa isu socodka gaaddidka magaalooyinka waaweyn.

Ooga sare Sool, waqtigii sahanka bisha 7 aad, goob joogayaashii iyo xog qaada yaashii waxey heleen, xaalada dhowr ah ee dad xoolo dhaqato ah oo xoolo yaraa isla markaana xoolo belay una guuray magaalooying si aay uga xoogsadaan, oo hadda soo laabtey si aay u helaan cood xoolaad sida badan ido iyo riyo. Waxey ku soo laabteen dhulkii miyiga ahaa iney ku noolaadaan. Waa dhab iney noloshoodu jilicsanatay isla markaana tirad reer guuraaga ah ee soo laabatey weli ma buura. Habnololeekan is bedelay ayaa lagu arkay Oogada sare Sool ee gobollada Sool iyo Sanaag, laakin lagu arag gobolka bari. Inkastoo aay jiraan ififaale wanaagsan ee dib u kobcid habnololeedka, daaqa iyo helitaanka biyaha oo liita aayna weliso guur gguridda xoolaha oo kordheysa si aay u helaan daaq oogada sare ee gobolka bari, tirade qoysaka xoolo yarawga ah kuwaasoo tiro badan oo xoolo ahi aay dhaafeen waqtigii abaarta ee 2011 ayaa sii kordhaya. In badan ayaa noqdey ***Xaafeyn-*** kuwaasoo haysta xeyn yar 20 illa 30 ari ah, in kar bar hayntii salka aheyd oo aay lahaayeen qoysaska xoolo yarowga ah sanadkii 2012, iyo iyagoo ku nool meelaha ku xeeran magaalooyinka iyo tuulooyinka.

Sahankii ***nafaqada*** ee bisha 7aad ee Oogada sae Sool wuxuu daaha ka qaaday in heerka nafaqo darrada guud(GAM) tahay 10.8 boqokiiba (CI 8.5 to 13.6) iyo heerka nafaqodarrada darran(SAM) tahay 1.5 boqolkiiba (CI 0.8 to 3.0).

Inkastoo natiijada sugnaanta cuntada ee habnololeedkan ku sugan dibadda gobolka bari aay hagaagtey, heerka deynta ayaa kordhay laga billaabo bisha 4aad illaa 7 aad, taasoo ugu badnaan ka timid rarida xoolaha iyo qarashka biyaha. Celceliska deynta ee qoysaska ayaa durbadiiba ku dhaweyd 300 Doollar bishii 4 aad iyo iyadoo sii korodhay kuna dhawaatey 400 Doollar bishii 7 aad, iyadoo qoysaku aay si joogta ah u qaadanayeen amah si aay ugu dabbiraan qarashaadka asaasiga ah. Inkastoo aay helayaan xoogaa kaalmo bani aaddanimo iyo deyn dheeri ah, qoysasku waxay helayaan cunto yar oo aan ku fileyn. Waxey ku waari doonaan iyagoo aan awoodin qarashaadka waxyaabaha muhiimka ah oo aan cuntada ahaan doonaana xaalad Wallaacsan (IPC wejiga 2).

*Malamaleyn*:

Tiiyoo la texgelinayo malamaleynta qaran ee kor ku xusan, malamaleynahan soo socda ayaa laga sameeyay hab-nololeedka xoolo dhaqatada Oogada sare Sool

- Biyo yaraanta ba'ani iney sii jiri doonto illaa laga gaarayo dhammaadkabisha 9 aad, Sidaa aawgeed, daqliga qeyb ballaaran oo qoysaska danyarta ah iney u weeci doonaan iibsashada biyaha, waa odorosid yareyneysa helitaanka qoysaska danyarta cunto iib ah.
- Kororka wax soo saarka bariiska caalamka oo kordhay aayna whliso kororo xilliyeedka waxyaaha dibadda laga keeno, iyo sidoo kale suura galnimada in suuqa lagu soo daayo keydkii hore ee waddamada bariiska soo saara waxay u badantahay iney qiimaha suuqyada caalamka hoos u riddo. Tani waxaa loobadinayaa iney qiimaha bariiska ee Oogada Sool hoos u dhigto. Qoysaska saboolka ah TOT ga waxaa loo badinayaa inuu ahaan doono mid wanaagsan.
- Heerka dhalidda Geela ee bisha 10 aad ayey u badantahay iney ahaato dhex dhexaad. Sida waa sida caadiga ahiyadoo geela Oogada sare Sool sida caadiga ah uu dhalo bisha 3 aad illaa 6 aad ee xilliga Guga, iyo iyadoo aan caadi u aheyn sida badan inuu dhalo bisha 10 aad illaa bisha 12 aad ee roobka Deyrta.s beddelka qaab xilliyeedka ayey sababtey geela oo caadi ahaan xoog u rimay xilligii Deyrta 2012/13, markii xoolaha ka yimid gobollada Sool iyo Sanaag region aay u guureen Oogada sare Sool ee gobolka bari iyo gobolka Nugaal
- Helitaanka caanaha geela iyo ariga ayey u badantahayiney kordhaan inta u dhaxeysa bilaha 10 aad illaa 12 aad, kuwasoo lala xiriirinayo dhalidda billowga roobabka Deyrta. Sidaa darted , sidaa darted helitaanka caanaha ee qoysaka danyarta wey hagaagi doontaa iyo herka nafaqo darran ayaa in yar hoos u dhici karta

*Sida loo Badinayo inay Sugnaanta Cuntadu Noqoto*

Inta u dhaxeysa bisha 8aad iyo horaanta bisha 10 aad iibsiga kordhay ee biyaha ayaa la filayaa iney yareeyso suuq ka iibsashada cunno ee qoysaska saboolka ah sababtoo dhaqaale ayey u weeciyeen biyo. Si kastaba ha ahaatee, inta waqtigan lagu jiro, iibinta xoolaha ayaa kordhi doonta dhoofka xoolaha Xajka dartiis, iyo iyadoo qoysasku awoodi doonaan iney dib u bixiyaan deymahii lagu lahaa qaarkood iyo iney helaan meelo kale oo cusub oo deyn ka qaataan iyo sidoo kale xoogaa lacag ah oo aay cunto ku iibsadaan. Inta lagu jiro waqtigan, daqliga laga helo xoogsiga iyo shaqooyinka kale ayaa caadi ahaan u hooseeyn doona sababtoo ah baahida loo qabo ayaa xaddidnaan doonta. Helitaanka kaalmada la siinayo qoysaska danyarta ayaa kordhi doonta sababtoo ah dhaqnaanta xoolah iyo qiimahooda oo wanaagsanaaday ayaa keeneysa in qoysaska ladan kaalmo ballaaran siiyaan kuwa danyarta ah. Inta u dhaxeysabilaha 10 aad illaa12 aad, da'amada roobka Deyrt ee bilaha 10aad illaa 12 oo caadi ku dhaw wehlisana waqti caadi ah guud ahaan dalka ayaa aad loo filayaa iney kordhiso helitaanka daaqa iyo biyaha oogada sare Sool. Sidaa darted wax soo saarka xoolaha iyo qiimahooda ayaa kordhi doona, tirada xoolaha iibsami kara iyo awoodda iibsashada ee qoysaska saboolka ah ayaa kordhi doona. Sako, oo ah fal diimeed lagu siinayo labo iyo bar boqlkiiba haynat xubnaha ugu qanisan mujtamaca, ayaa sida caadi ah dhici doonta bish 11aad. Siismadan darted, qoysaska saboolka ah waxaa sii kordhi doona helitaan cunto oo dheeri ah.Helitaanka caanaha ayaa la filayaa iney yaraadaan laga billaabo bisha 8aad illaa 10 aad sababtoo ah helitaanka daaqa iyo biyaha oo yaraadey iyo sidoo kale tirade xoolaha irmaan oo yaraadey. Si kastaba ahaatee, dhalidda geela oo dhexdhexaad ah, iyo tan ariga oo sarreysa yaa la filayaa bisha 10 aad, taasoo sida la filayo kordhin doonta helitaanka caanaha iyo iibkooda illaa bisha 12 aad.

Waxsoo saarkooda caanaha iyohilibka oo dhex dhexaad ah ayaa ah kan ugu horreeya oo aay cuni doonaan inta u dhexeysa bilaha 10aad iyo12 aad. Sababtoo ah geela iyo ariga oo dhalaya. Tiro aan saa u buureyn oo ururrada maxaliga (NGO) ah ayaa qabanya qorshooyin samafal badbaadineed taasoo aay u badan tahay iney ka faa' ideystaan qoysaska saboolka ah inta u dhexeeysa hadda iyo bisha 12 aad. Inta u dhexeysa bilha 8aad iyo 9 aad oo aaney jirin caanaha riyaha iyo helitaan cunto ka iibsiga suuqa caadi ahaan, xaaladda nafaqada ayaa la rajeynayaa iney ahaato mid deggan. Inta u dhexeysa bilaha 10aad iyo 12 aad waxaa suuro gal ah iney kordhaan helitaanka caanaha.

Ka sokow illaa iyo xad waxsoosaarka xoolaha iyo qiimahooda oo caadi ah, qoysaska saboolka ah eek u sugan Oogada sare Sool waxay wajahayaa isbeddel xilliyeed ballaaran ee helitaanka cuntada iyo biyaha, iyo iyadoo helitaanka biyuhu uu adkaan doono in badan. Iibsiga biyaha ayaa si baaxad leh u yareyn doona tirade lacagta ah ee la heli kari si loo iibsado cunto. Hayntooda xoolaha ayaa ku dhaw heerkii haynta salka ah, laakin waxaan jirin qaab loo badbaadiyo hab nololeedka oo aan aheyn iibinta xoolahooda. Sidaa darted hal massibo ayaa si baaxad leh u yareyn karta heerka hayntooda iyo iyadoo si fudud u yareyn karta daqligooda mid ka hooseeya cabirka badbaadinta habnololeedka. Heerka ammaahda ayaa ahaan doona mid sarreeya iyo la filayo in uu la kordho xilliga inta lagu jiro bisha 8aad illaa 10 aad xilliga yibir baroorada. Waxaa intaa wehliya, qoysaska saboolka waxaay intabadan cunto ku helaan ammaah iyo kaalmo xilliga yibir barroorada. Iyadoo lagu saleynayo qoddobada kore gabogabada sugnaanta cuntada ee qoysaka danyarta ayaa lagu sifeeyey heerka Wallaaca ( IPC wejiga 2) laga bilaabo hadda illaa ugu yaraan bisha 12 aad.

## DHACDOOYINKA BADDALI KARA MALAMALEYNTA

**Shaxda 1:** Dhacdooyinka suuro galka ah lixda bilood ee inagu soo fool leh malaleynta Odorosidda ugu suura galsan

| Goota | Dhacdada | Saameynta uu ku yeelanayo sida uu noqonayo sugnaanta cuntada |
|---|---|---|
| Oogada sare Sool | Wadarta roobabka Deyrta ee bilaha 10 aad illaa 12 aad oo ka hooseeysa dhex dhexaad ama baahsanaantiisa yo waqtiga da'amaddisa oo aad u liidata | Xilliga oo liita waxuu dheelitirayaa sida uu noqonayo wanaagga sugnaanta cuntada la saadaaliyey. Oddorosiddaan waxaay u badantahay iney sii xummeyaan cadaadiska saran kheyraadka daaqa iyo biyaha xaddidan. Meelaha qaarkood, cadaadiska xilliga qallalan iyo biyaha ayaa sababi kara dhimashada tiro xoolo ah oo aad u badadan, gaar ahaan Oogada sare Sool ee gobolka bari,helitaanka biyaha ayaa noqon kara mid si xaddhaaf ah u xaddidan, taasoo sababi karta dhicinta xoolaha oo korodha. Daqliga qoysaska saboolka ayaa si baaxad leh hoos ugu dhici doona sababtoo tirade xoolaha iibsami kara ooyaraaneysa sababtoo dhaqnaanta xoolaha oo xumaaneysa. Isticmaalka hilibka iyo caanaha ayaa dhici doona, iyo heerka nafaqo darrada oo kordhi doona. Helitaanka cuntada ayaa si baaxad leh u dhici doona, kordhinna doona tirade qoysaka saboolka ah ee ku sugan cunto suququn iyo iyagoo wajahaya xaaladaa Dhibanaash ( IPC wejiga 3). |
| Gebi ahaan goobaha Somaliya, gaar ahaan goobaha miyiga iyo magaalooyinka kuwaasoo oo bariisku u yahay quud darruuri | Wax soo saarka bariiska ama xaddiga la dhoofin karo ee ka immanaya waddamada wax dhoofiya oo ka hooseeya heerka dhex dhexaadka ah. | Xaaladda cimilada ama siyaasadda Dowladaha oo xumaada ayaa yareyn karta sii deynta keykii bariiskii hore ee socta. Tartanka ka dhexeeya waddamada bariiska dhoofiya oo yaraada ayaa saari kara cadaadis kor u kicid qiimaha bariiska la dhoofiyo hadda oo hooseeya. Qiimaha bariiska dhoofka ah oo kaca ayaa si deg deg ah ugu gudbi doona suuqyada Somaliya, taasina aay yareyn doonto awoodda iibsasha iyo helitaanka cuntada qoysaska saboolka |
| Hab nololeedka beer iyo xoolo ee Hiraan | Tirada da' mada roobka Deyrta ee bilaha 10 aad illaa 12 aad oo ka hooseysa heerka dhex dhexaadka ama waqtiga ama sinnaanta da'mada oo aad u liidata. | Tani waxaay yareyneysaa wax soo saarka beeraha ee hab nololeedka beero-xoolo dhaqtada xilliga Deyrta aayna wehliso wax soo saarka xoolaha iyo qiimahooda oo hoos u dhaca. Wax soo saarka beraha iyo xoolaha oo yaraadawaxaay wax yeeleyneysaa helitaanka shaqada beeraha, firileyda suuqa la keenayo, iyo iyadoo loo badinayo iney sabato qiimaha firileyda dalka laga soo saaro oo aad u kordha, iyadoo in badan oo arrimahaas ah horey loo saadaaliyey. Ilaha cuntada iyo daqliga ee qoysaska saboolka ah ayaa noqonaya kuwo sii yaraada. Sidaa darted qoysaska saboolka waxaa soo food saaraya cunto yari ba'an oo aay wehliso nafaqo darro iyo dhimashada oo badata. Taasoo u badan iney sababto tirade qoysaka ku dhacaya xaaladda cunto yarida Degdegga ah ( IPC wejiga 4) inta u dhexeeysa bilaha 10aad iyo 12 aad 2013. |
| Gobolka Hiraan | Colaadda oo yaraata ama korodha gudaha gobolka Hiraan | Degganaashaha ayaa kordhin karta helitaanka kaalmada bani-aaddanimo iyo dhaq dhaqaaqa ganacsiga. Nabad gelyadu sidoo kale waxay kordhineysaa howlaha dhismaha iyo dib u dayac tiridda, taasoo kordhineysa baahida shaqo iyo daqliyada iyo helitaanka cuntada qoysaska saboolka ah. Joojinta barakaca dadka ayaa la qiyaasayaa iney sababto hagaagidda sugnaanta sida aay noqoneyso. |

## ARRIMO KU SAABSAN HORUMARINTA ODOROSIDDA

Si loo saadaaliyo sida aay noqoneyso sugnaanta cuntada ee lixda bilood ee inagu soo fool leh, FEWS NET waxey dhistay tiro mala- awaal ah kuna saabsan dhacdooyinka ugu suurto galsan, wax yeeladooda iyo jawaabaha aay ka bixi karaan qeybaha aay quseyso. FEWS NET waxey falanqeysay mala- awaalkaas xaaladda hadda iyo habnololeeyada dalka si aay u sameyso malomaleyn qiyaaseysa sida aay noqoneyso sugnaanta cuntada. Sida caadiga ah, FEWS NET waxey tabisaa malomaleynta ugu suuro galsan. Dhanka Somaaliya, waxaa habkan ka qeyb qaata FSNAU xilliga falanqeynta Guga iyo Deyrta dabadii si loo dhiso malomaleyn mideysan oo lagu wargelinayo kooxda go'aan qaadashada sugnaanta cuntada iyo in la sameeyo qorshaha xaaladda deg degga ah ee Somaaliya.

FEWS NET waxaa maalgeliya USAID. Dulucda qormadaan muhiim uma aha iney tilmaameyso fikirka USAID ama Dowladda mareykanka.
FSNAU waxaa maal geliya dee biyeyaal badan waxaan maamula FAO (heyadda cunta iyo Beraha )